- Gabadha shan jeer ilmo lagu soo qalay Ninka rabo in oow Uur
u yeelo ujeedkiisa waa in oow dilo Ilmahiisa Hooyad.

Culimada qaar kuma baraarugsana arinkaas.

Naagta Ilmo hadhasho, yeeysan joojinin ayeey *TV* ama
Idaacad ka sheegaan .

=====

=====

XAMARTA CUSUB HALAGU YAACO.

2025

Dal xoreeya-yaasha Xasan & Xamze

waxeey dhagax dhigeen Muqdishada cusub.

Deegaan ahaan waa meel raqiis ah, halagu yaaco hadeer hana la
iibsado dhulkaas

Gorgortanka halkii boos 500\$ halaga bilaabo, yaanan Bulshada
lagu qaaliyeeynin.

- Xasan ha noosheego.

Lacagta lagu maalgelinaayo xagee laga keenay?.

Shalay Doowladiisa maxeeey Qabuuraha u burburisay hadiiba
dhulkaas la heli karay.

hadii maantaba la leeyahay Gegi-diyaaradeed ayaa laga dhisayaa
halkaas.

-Fahad-Yaasiin maqaal qiimo badan ayoow ka qoray markii Xabaalaha Oowliyada lafahooda
banaanka lasoo dhigay qofkii rabo waa aqrinkaraa maqaalkaas,
Qabri la xabaal qodo cuqubiga naga raacay waxeey dhashay Qaraxyada ZOUBE , Shaamoow iwm.
Shalay Ninkii xilka haayay ayaa maantana Doowlada xil ka haayo, Sheekh Cali wajiiz & Sheekh
Soomoow & Sheeq Bashiir salaad , dhamaantood beerka ayaan ka jecelnahay Allaha barakeeyo
balse aniga baabkaas waan ku qilaafay.

Doowlada ma waxeey damacsan tahay in Garoonka Balidoogle
lagu bedelo midkaan cusub?.

ciidanka cirka miyaa loodhisayaa.

Bulshada Soomaaliyeed ha ku baraarugato , yeeysan qofna ka
yeelin in Ciidanka cirka lasoo dul dejiyo magaalada.

Garoon Rayidka leeyahay halaga dhigo balse mid ciidan loo
dhisaayo, amaan ahaan uma fiicna Bulshadeena.

-Dagaalka Eraan lagu qaaday 2025

waxoow dadka ku qasbayaa qaabka magaalo loo degan yahay in
wax laga bedelo.

Guri dabaq ah kana kooban 30

hal mar in dhulka lala simi karo weey idiin muuqataa

Soomaali Dhulka kuma yara Wadooyinka haloo badiyo
hana la kala fogeeyo Bulshadeena.

Gobol walba hala dhiso yaanan laga soo guurin

-Goof banaan in ladhisaana yaanan la diidin

Magaalo kuu dhisantay maalkaaga oo kordhay
ayeey lamid tahay.maanka ha shaqeeyo .

MUDULLOOD maalgashiga yoowsan diidin.

Magaalo ayaa lagu dhisayaa.marxaba ha ahaato jawaabta.

hadaa dhahdiin lama dhisaayo dhulkaas banaan dhul

Soomaaliyeed naguma yara lana maal gashado.

-Muruq Soomaali leedahay ayaa dhulka lagu difaaca,

Maxaas & Moqokori Raga halkaas ku hortaagan Khawaarijta

waa Mushakal waana Meleteriga Soomaaliyeed Qabiil walbana
ka kooban.

Diin ahaan dhulka Doowladaa iskaleh, hadoow yahay dhul
banaan oo cidna deganeeyn.

Geella & Lo`da & Ariga halka eey daaqi lahaayeen Doowlada
ayaa laga rabaa in eey xaliso arinkaas.

=====

#MUDAAHARAAD.

#GUULWADE.

#BANAANBAX.

#ISKU SOOBAXYO.

#OLOLE

Intaas oo erey bixino ayaa jirto.

-GUULWADE xiligii kacaanka ayaa aad loo adeegsan jiray.waana qofka Doowlada aadka ula dhacsan wax qabadkeeda.

-OLOLE waxaa aad u adeegsado (N.G.O)
sida qolyaha caruurta jadeecada ka talaalo.
Ololaha talaalka ayaad maqleleysaa.

-BANAANBAX sida badan beryahaan waxaa loo adeegsadaa
midka nabada lagu taageeraayo
BANAANBAXYO nabadeed ayeey Weriyaasha tebiyaan.

-ISKU SOOBAXYO rabshadowato =Mudaaharaad.

Afcarbeedka ayaa Soomaali laga dhigay waana midka aan ka hadli rabno.

-Diin ahaan ma banaantahay?.

Imaam Cali Iftiin wejigiisa haka baxee

Ilmaha oow dhalay ee kala ah

IMAAM XASAN & XUSEEYN

Rabigeen haka raalinoqdee dhamaantood.

Hub ayeey uqaateen Doowladii Islaamka.

Inaga Hub ayaan qaadaneeynaa .

Dowlada ayaan la dagaalameeynaa sidaas ma dheheeyno balse
FIRINBI & BUUN .

lug Baabuur Laamiga lagu gubaayo

Shaqada kala socoto ee magaalada oo la banado ayaan ku
dhaqaa-qeeynaa Dimoqoraadiyada xalaasha ah waa midaas.

BOOLISKA, XAMAR.

ZAKIYA, XUSEEYN

Gabadhaas TALISADA ah Qoraaladeeda waan aqriyay.

waxaan dhihi lahaay

Dowlada Rasaasta Qiiqa bixiso ee xanuun Indhaha kurido hasoo
diyaarsato

Hana ogaato waxaa nahay kuwii codka siiyay.

Doowlada markeey nala dagaalameeyso Boyad Biyo Qaboow
nagu rusheeyso hasoo diyaarsato.

(*Sheeq Rusheeyaha runta ah beryahaan xaguu ka baxay, cayuunka eey qabijireen Dumarka maka
caafimaadeen?*)

Qibladdeena siyaasada marka DOORASHO la soo hadal
qaado ,waa Koonfur Afrika & KENYA

Dal Muslim ah marka laga hadlaayana TURKIYA ayaan
Tusbaxooda ku tixanahay, Tooshka iftiinka badan
Bulsho xor ah markeey tahay iyagaan ku deyanaa.

=====

#SIYAASADA.

DIMOQORAADIIYADA ADUUNKA.

hoos beey usocotaa.

Giriiga FEEYLASUUF kooda Aflaadhoon magaciisa ahaay

2500 oo sano kahor Buugiisa oow kaga waramaayay

SIYAASADA ama AL-JAMHUURIYA.

ama AL-MUXAAWARAAT.

Dimoqoraadiyad in eey Dalkiisa kajirto ayoow ku dhex sheegay
isagana qof ahaan waa necbanaay doorasho xalaal ah in la
qabto, waxoow jeclaay qof Feeylasuuf ah in oow dalka xakumo.

Dimoqoraadiyada Aduunka looga dhaqmo hadeer cimri ahaan
kama weeyna 200 oo sano ama 300.

.

Doowladaha Aduunka soomaray sida eey ubadan yihiin
waxeey ahaayeen BOQORTOOYO ama ASKARI AFGENBI ku
qabsaday Dalkiisa.

-maxaa lagu nacay Dimoqoraadiyada?.

munaafaqad & balan ka bax ,waxa Bulshada loo balan qaado
marka lagu jiro xiliga doorashada
oo aanan la qabanin hoowsheeda , sida Gobol hebel waxaa laga
balan qaaday in Buundo loo dhisaayo , marka codka laga
gurubsado , canshuurna waa laga qaadayaa Buundadii loo balan
qaadayne looma dhisaayo. ama Wershada hadba wixii looga
baahan yahay Gobolkaas.

Gobol walba baahi ugaar ah ayoow qabaa.

-AFRIKA KEENYA & Koonfur Afrika

labadaas Dal ayaa la dhihi karaa waxaa ka hirgalay
Dimoqoraadiyad.

Dalka NEEYJEERIYA waa run waa DIMOQORAADI balse
sida labadaas Dal doorashadooda xalaal uma ahan.

-**SHUUCIYADA** ,ama HANTI WADAAGA, iyadana Shalay
kama dhalanin Aduunka

FEEYLASUUFKA Aflaadhoon ah Dadka waxeey sheegaan
inoow isaga Mad-habtaas SHUUCIYADA ah jeclaay ku
dhaqankeeda .

Aduunka meel maanta looga dhaqmo majirto Shuuciyada
HANTI-WADAAG ayey ku dhaqmaan Doowladaha hada jiro.
-Shuuciyadda ku dhaqankeeda waxaa kamid ah Dumarka lama
kala lahan Hantida lama kala lahan
dhaqanka nuucaas ahna Aduunka meel looga dhaqmo ayaanan
jirin .

Umadaha Aduunka ku nool qeeyb ahaan waa HANTI
WADAAG.

-Doolwadii KACAANKA ,HANTI-WADAAG beey qaadatay
balse Shuuciyadda ma qaadnin
taas hala ogaado ,mucaarad iyo muxaafid midkaa tahayba.

=Nabi Yuusuf markoow soo rogay Qaanuunka ah Dalaga
beeraha kasoo go`ay hal meel haleeskugu keeno hana loo
qeeybiyo Bulshada, dhaqankaas waa HANTI-WADAAG.baahi
jirtay ayoowna Bulshadiisa ugu soorogay .arimahaas iyagoo
faahfaahsan

Buugeena weeyn ayaad ka daalacan kartaa waxaana la qoray 10
sano kahor.

=maxaa loonacay HANTI-WADAAGA ?

mad-habtaas Ninka aadka u bayaaniyay waxoow ahaay
MAARKIS .

*Buug lagu magacaabo "baaqa shuuciyada"

waxaa mar dhexdaas ah tarjumay C/ Casiis guud cade.

100 bog ayoowna ka kooban yahay.*

isagana dhibka heestay waxa waaye, Diin naceeybka
YAHUUD, MASIIXI, MUSLIM wax walba oo Diin ku saabsan
inoow la diriyo ayoow isku deyay.

waxaa layaab leh, qof ka hadlaayo RAASHIIN
mad-habna kadhigtay qaabka loo maamulo hantida
maxaa ku kalifaayo inoow Diin ladagaalamo, waa uun tacasub
indhoo la aan ah .

AFLAADHOON , waxa oow Shuuciyada u jeclaaday waxeey
sheegaan isagaa ISKAABULO ahaa.y

Naag ma oowsan guursanin, markaasoow iskaba jeclaaday in
Dumarka la wadaago.

MAARKIS isagana cuqdad ayoow Diinta ka qaaday
markaasoow mad-habtiisa ku dhex darsaday in lala dagaalamo
wax walba oo astaan diimeed wato.

Doowladii KACAANKA jidkeeda ku laaban meeyno
Shacabka TURKIGA , TAANGIGA KAARAHA ayeey isku
dhigeen waxeeyna ka difaacdeen ciidamada.

in eey afgenbiyaan DIMOQORAADIYADA ka jirto
TURKIGA.

XASAN ha joogo ama FARMAAJO hasoo laabtee
idinka ayaa ladoonayaa in aad ka ilaashatiin cadawga .
is doorashada waa hanti, Dhiigbadan ayeey Soomaali ku bixisay,
Doowladooda ayeey ku waayeen
30 sano ayaa cunaqabateen dhinaca HUBKA loosaaray , TIIH
ayeey u muteen.

Wadaadka waxgaradka ah waxaa lagudboon FIQHIGA in
oowsan ka hagrarin Ma-hbtaas eey Soomaalida dooratay
,HAWIYE kursiga ku raago weey ku caajisaan
DAAROOD , Boqortooyo ku gaarana kaba daran
DIGIL&MIRIFLE weli looma darin Fandhaalka weeyba
qatanyihiin, si eey qeeybtooda u helaan waa in
DIMOQORAADIYADA hanaqaado lana taageero
Mad-habtaas sida FIQHIGA loogu taageeray MUCAAWIYE
Doowladiisa Boqortooyada ahaan jirtay SHUURADA Nabiga
intoow meel iska dhigay.

Mad-habta Shaafici +Xanafi +Maalig

dhamaantood kama waramaan sida eey ku ansaxeeyso

SHUURADA ama Xubin Baarlamaan oo la soodoorto.

-DOOWLAD HTI-WADAAGA ah & kuwa ah HANTI-
GOOSADKA ah qaabka aan ula xiriiri karno Doowlad ahaan.

Gacanta midig aan kula ganacsano HANTI-WADAAGA

Gacanta bidixna HANTI-GOOSADKA.

(wa ina axadun minal mushrikiina istajaaraka ...)

-DIINTA& DOOWLADA.

Kacbada dhankeeda waan u dukanaa , Soonka iyo Salaada iyo
xajka.

Shaafici waxoow sheegay shanta tiir ISLAAMKA.

KACBADA dhinaceeda ayaan u dukanaa, KENYA dhinaceeda
ayaan ka qaadanaa DOORASHADA, Dimoqoraadiyada.

TURKIYA,INDUNIISIYA,BANGAALADEESH &

BAKISTAAN.

EERAAN.

Bulshada HINDIYA 300 oo Milyan ayaa Muslimiin ah

FAQRIGA dartiis ayaa lagu bari waayay

Doowlada Reer AALASA-CUUD oo 30 milyan ah sababta loo
buunbuuniyay heer laguba dhega barjooway soonoq-noqoshada

hadalkooda, waxa sidaas loo sameeyay waa SANUUDA eey
heestaan darteed

-BANGAALADEESH maxaad u baran weeysay, iyagaa ugu
badan Aduunka, ama lagu bari waayay?.

ujeedkeeyga waxa waaye BULSHADEENA Wadada eey
dooratay waa DIMOQORAADI

Culimada Soomaaliyeed intee Hubka qaateen kuma eeysan
qasbin , iyagaa qiyaar u doortay. iskuna dilay dhiigooda ayeey
iska daadiyeen.

Imaam SHAAFICI hadii oow FIQHIGA ku miisaamay sida eey
Doowladii Cabaasiyada rabtay ee ah BOQORNIMO
inaga waxaa nala gudboon in FIQHIGA aan ku dhisno waxa eey
doorteen Umadeena.

-HARGEYGA yaanan hilmaamin waa HOOYADA
Soomaalida hadiiba DOORASHO lasoo hadalqaado.

Abwaanka waxoow HEES ku yiri"

*Sharci diiwaan ku suganoo umadu ay usimantahay socodsiiya
nabad sugan*

*sad bursiima siinayn ,qofna sadkii ka qadinayn culimadu
saxeenoo Beeluhu saxiixeen*

Soomaalidaan ku caantahay"

Farxiya Fiska ayaa qaado Heestaas.

balse Muqdisho kama dhex qaadi karto Mahad salaad

ayaa joogo.

Marwo Fooziyo & Xildhibaan DHALXA

hadii aan la kaftamo waxaan dhihi lahaay

Xamar iyo Sooomaalida koonfur degan in DASTUUR loo sameeyo maba u baahna, midmaas HARGEEYSA lagu dhaqo ayaaba naga badan, isagaas halaga saxo meelaha Lahjad ahaan la fahmi waayo.

=DHALXA =MOOS . Waana Afcarabi.

Quraanka soow kuma arkin

(wa dhalxin manduudin)

Reer Beeydhabo Mooska BUYOOW ayey dhahaan sidaas ayaana Afsoomaaliga ahaanjiray inagaa luminay Ereygaas.

=SHEEKO-XARIIR.

-Xildhibaan Dhalxa isagoo Beer ASEENDO ah Gacan MOOS ah ka soo goostay ayaan ka hor imid waxoow yiri xagee u

socotay waxaan dhahay Beerta ayaan Gacan Moos ah ka soo goosan rabaa.

Waxoow igu yiri tan aan aniga ka soogooyay ayaaba naga badan, waxba ma loo baahna in adigana kasoo gooyid Moos kale Beerta

Waxaan ula jeedaa Dastuur hadii oow HARGEEYSA noo dhexyaalo midkaas ayaaba naga badan.

#TAARIIKH.(1)

-Bulshada cunto Ugaarta & Beelaha ka caagan yaa Islaamka u dhaw?.

Dadka qaar waxeey dhahayaan Sagaaro macuno,Baciidna kaba daran Diggirankana waa lamid.

Arintaas ayaan soo ogaaday halka eey salka ku heeyso.

Xabashida Ugaarta ma cunto waxeey iskaga daayeen Diinta Masiixiga darteed.

Qoladaan tiri ma cuneeyno Ugaarta

Waxaan is leeyahay waagoodii hore ayeyy Xabashida ku diin
ahaayeen sida Suudaanta.

-ANSHAX ahaan ma wacantahay NEEF XOOOLO ah aadan
weligaa abaal ugelin

Dawo siinin Biyo usoo aroorin Ubadkiisa daryeelin in aad soo
ugaarsatid weliba Hilibkiisa ka ganacsatid, sidaas cadaalad
miyaa?.

Xoolaha aan dhaqano xanaano ayeyy naga helaan sidaas ayaan
Hilibkooda u xalaashanay.

-ANSHAX ahaan sax miyaa Qaalin Geel ah ama Qaalin Lo'aad
taasoo aanan weli qaangaarin weli Hilib yeelanin caato ah in
SACUUDIGA loo dhoofiyo

Dheeylo waaye kaas ayaan hilibkiisa jeclahay in oow dhaho
soona dalbado, hadhoowna Neefka Hilibkiisa Qashinka ku daro,
ileen waa Nin Carab ah Lacagna ka dhergay baahina u qabin
Hilib xoolaad balse xiiso iyo dhedhemis & dhereg dhacsi
darteed u dilaayo nafleeyda.

-XOOLAHA aan dhaqano xuquuq ma lahan miyaa?.

Neefkaas nafta ayaa la dhaafiyay ninka goowracayne Hilib kama helin

Qofkii Neefka Geela ah hal sano ka badan sugaayay in oow
Neefkaas caano dhalo isagana kuma nacfinin.

=====

- Bulsho ahaan hadeer dhaqaalo ma heeyno, duruuf ayaa loo xaraashayaa Xoolaha,oo Geedka eey daaqi jireen waa hore ayaa Dhuxul lagadhigay.

Neef caruur ah yoowsan Dekeda ka dhoofin
ha soocayiliyo ha weeynaado xoogaa.

-Nabi Suleeymaan Quraansho,Quraanji,ayoow ku qoslay halkaas waxaa ku qarsoon in xuquuqda cayayaanka la dhoowraayay.

=Nabiga waxoow yiri noolaha in lagubo waa mamnuuc
Quraanshi ayeeyna ku saabsaneeyd qisadaas.

=Geel ayaa waxoow usoo dacwooday Nabiga, duruuf heeysay ayoowna kasoo cawday. daryeel leeyma siinin ayoow dhahaayay Geelaas ,Culimada weey nooga qisoodeen arimahaas, Qalbiga xusuusin ayaan halkaan ugu qorayaa mar kale.

=====

.(1)Sheekh yuusuf Alkoowneeyn , waxaan ka shakisanahay in oow ahaay nin Reer koonfur ah
ALIF WAX MALEH , ALIF LA KORDHABAY ALIF LA HOOS DHABAY.
hadii labaaro lahjadaas qofka iska leh waa qof Koonfur ka yimid.si wacan in loo baaro ayeeyna u
baahantahay .
in Gobol lagukoobo Culimada wax wanaagsan ma ahan . waxeey ahaanjireen, sanadkiiba 3 bil ama 4
bilood kuwo u baxa TABLIHQ cilmi faafin ah.

=====

=====

#MAD-HABTA NABADA.

Cali mooge Geedi & Gacal xaayoow.

Labadaas Abwaan ayaa NABADA mad-habtooda tahay

Aniga oo halkaas kasii anba qaadaayo si eeysan

Ma-habtaas u dhimanin,hadallo ayaan halkaan ku qorayaa

JACBUR haba u badnaato sheekada aan halkaan ku

qoraayo,marmarka qaar waa loo baahan yahay in lasoo dhex

geliyo moowduuc ka baxsan midkii lagu balamay in laga hadli
doono .

"ANSHAXA "

"DAD LADHAQANKA"

"DABCI WANAAGA"

ayaan ka soo hadalnay

maqaalka qeeybtiisa

1-aad.

2-aad.

3-aad.

balse qeeybtiisaan

4-aad.

moowduucyo kale ayaa ku dhex qasan

aqristaha haka raali noqdo , mashquul keeygana

ma yara.

HADAL QALBIGA TAABANAYO

ayaa jiro

HEES:

*Tabta roobku daruurta hadba uu tis ukeeno hadalkaad itiribaa
igu sii tarmaayee.}*

- qofka Bini aadanka ah horay kama garto hadalka ujeedkiisa
laga yaabee mudo ka dib in oow soo nibdaado.

Colaadda marka nafta la xusuusiyo ayaa la gartaa
waxa nabadda tahay.

sanadka 1992-2000

Degmada KAARAAN & Kiiloomitir 4

Ragbeey u kala qoqobneeyd

Qad cagaaran ayeey dheheen

Fanaanka C/Juba & Xasan Aadan samatay

waa Fanaaniinta ugu nabada jecel, heesaha eey xiligaas qaadeen
waxeey xooga ku saareen Islaaxinta Umada Soomaaliyeed.

HEESTA , Qad cagaaran, waa xiliga eey soo baxday .

Samatar isaguna waxoow soo saaray Albumka DEJIYA.

Qalinkeena ma ahan mid qof xaqiro mana ahan mid qof walba
oo Kheeyrka nagu dhex faafisay mid wada sheegi karo.

Culimada waxeey dhahaan afar istaqaano Illaaheey nagama
dhigo.

Abwaanka & Heesaaga, cod iyo curinta suugaanta ku saleysan
NABADA Umadeena ugu hiiliyay

Rabi kama dhigo inyar oo hal qof ka wada sheekeen karo .

Shalay Muqdisho hadii eey kala xerneeyd.

Shaxda Ciyaarta oo la bedelay waxba ma dhaanto Ninka

Ceelbuur & Jilib Askarta dhexkeenay una qaatay in Soomaali
sidaas lagu xakumi karo.

"Qof weeyn walaaloow waxoow ku dhaamo la waa"

=Naag meherso, qasabna ku meherso waa xaaraan adigaa
afkaaga ka yiri , meher xadkana waa xaaraan adigaa baabkaas
mad-hab ka dhigtay kuna dhaqmo midaas balse aniga
MASAAFO WAA II XALAAL.

FIQHI ahaan waxaa wanaagsan in miisaan lagu socdo

Naag qasab lagu mehersaday

hadii eey xaaraan tahay , Doowlad in la afgenbiyo iyadana waa
xaaraan, Cod bixiyayaasha

<SHUURADA>

codadkooda in la qiyaano iyadana waa xaaraan
in Bulshada afti laga qaadi waayo iyadana waa xaaraan
loona diido in eey soo doortaan qofka eey jeclaadaan.
hadii layiri Gabar yaanan qasab lagu meher sanin waxaa ka
miisaan culus Umad dhan in Madfac lala dul yimaado
iyadoo damaca yahay, qasab ayaan idinku xakumayaa.

=Abwaan Cali Mooge geedi

Waxoow Suugaan ku yiri

"Ninka fooraroow toos adaan kaa fajacayaaye"

dadka rayidka ah halka eey degan yihiin ha maleeynin furin dagaal, Madfaca kaqaado meesha.

-Nabigeena nabigii Naxariista waa isaga.

-Nabi Ibraahim waxoow isku deyay in oow Malaa igta ka maslaxo Qoomkii Qaniisiinta ahaay, inta aanan la halaagin beey eheeyd.

Waxuu yiri, war meesha qoos aan jecelahay ayaa dhex degan ee madaxooda ku daaya.

Rabi waatoow ka jawaabay arinkaas

(ina ibraahiima la awaahu xaliim)

-Soomaalida qalafsanaanta ayaa ku badan

Qofka Nabad ka hadlaayo siiba wax ka baxsan

Soomaali-nimada waxeey uqaataan in qofkaasi yahay qof fulay ah.

FIQHI la aanta ayaa u sabab ah midaas & Wadaadka oo Qalbiga ka engegay markoow wax badan ku mashquulay barashada Fiqhiga qalalan ee ku dhisan Ciqaabta iyo kala kaxunka laba muran san.

FEEYLA SUUFKII udhashay Giriiga AFLAADHOON

Waxoow yiri, Askarteena waa in Muusigada la baraa Heesaha lagu hanuuniyaa

Waayo waxeey inbadan ku hoowlan yihiin dagaalka, qofka dagaalamo dabci qalafsan ayoow yeeshaa hadhoowna Reerka ayoow kula soo noqdaa dabci xumadiisa.

Heesaha wadaniga ah ama dhaqanka suuban lagu amaanaayo, dhoowrsan laga dhoowrsado xaaaraanta sida xatooyada, ama dumarka oo laxoogo ama sharafta Aadanaha oo la yaso waxaas waa in heesaha laga curiyaa qiyamka oo korloo Qaado waa in lagu amaanaa heesaha la curinaayo ayoow dhahay.

-Wadaadka waa iska diiday Heesaha inoow dhageesto waxoowna yeeshay dhaqan Askari, waayo qofka ku hoowlan Qaadi nimo, Minhaajka oo la aqriyo wax QISO ah oo qalbiga dhaqaajiso aanan laqrineeynin sida Nabiga yeeli jiray ama Masiixiyada ahaan jireen

Quraankana waa tilmaamay arinkaas

(thaalika bi ana min hum qisiisuuna wa ruhbaana wa anahum laa yastakbiruun)

=====

=====

#IMAAMSHAAFICI &SUUFINIMO.

waxoow yiri Suufi noqo balse mid aqoon diinta uleh ahaaw.

Faqiih noqo balse qalbi debecsanaaw sida Suufiga.

Waxoow yiri Faqiih noqo Suufina ahaaw.

=Gabayga & shaafici

culimada weey ka caagan yihiin in eey gabay tiriyaan.

hadii dabarka culumanimo i celineeynin Carabta midka ugu suugaanbadan ayaa noqon lahaay.

-Qalbi naxariisto hadii oowsan igu jirin Dadkoodhan mid adoonsado ayaan noqonlaahaay.

sidaas ayoow dhahay Imaamka.

1400 sano kahor hadii wadaadka QALBI adeeyg lagu calaamadeeyay maanta oo ADUUNKA Dal walba gooni-diisa u suubsaday SUN lagu halaagsamo, soorid ayoow dhahayaa halka aad ka gashid ayaan ka gelayaa.

=====

#MAGAALADA **JILIB** MADAXWEEYNE JAREER AH
AYAAN LA JECLAAY.

-Nabi Miise waatuu Dalka Urdun megengelyo weeydiistay halkaas isaga madax kama oowsan eheeyn balse Ari raac ayoow ka ahaay, Nabi shaqeeysto Ubadkiisa u xamaasho . Xaas waa ka

guursaday ubadna waa ku dhalay URDUN. xiligaas Israa iil
Qabiil ayeey ahaayeen dhex degan Masar. Nabi Yuusuf xiligiisa
ayeeyna usoo guureen halkaas.

-hadal kaasna wax laga xajiimoodo ma ahan, Nabi Muuse
maqaam-kiisana hoos uma dhigeeyso, walaaladeena lagu
dhibaateeyay, FIRCOOWN agtiisa wax laga argagaxo
weeytahay.

Aadanaha xili eeysan Aduunkaba dhex joogin ayaa jirtay Sinji
naceeb ama Isir naceeb igama ahan .

=Imaamkeena Cusmaan bin cafaan

Magaalada UBUKH meel agteeda ah

ASMARANA ka shisheeyso

OKSOOM waa toow u hijrooday

IMAAM waxaa u ahaay NAJAASHI.

Ninkaas Qoomiyad ahaan waa TIGREE

inaga Soomaali hadaa nahay TIGREEGA walaalo ayaa nahay siiba kuwa Muslimiinta ah

waa JABARTI , Qabiilkeena DAAROOD isagana naaneesta JABARTI dhinac boow ka

wataa,DAAROOD ISMAACIIL JABARTI. qormo hore ayaan kaga hadlay markii aan usoo abtiriyay

Sheekh ZEEYLICI wadaadkii 1000 sano kahor kunoolaay Zeeylac ee Kutubada badan inooqoray.

Kutubka "AXAADIIS AL HIDAAYA"

Kutubka" Axaadiis al kashaaf"

Buugaagtaas ayoow qoray wadaadkaas

-Qabiilka DAGOODI & Booranta

halkeey wada degaan agtooda , Gobolka LIIBAAN

& BAALLI oo ah Dhulka OROMADA

halkaasna waxaa laga sheegaayay

dhul looyaqaano JABARTA.

asal ahaan DAAROOD waxaaba loo yaqiinay DHULKA balse Qabiil maba eheeyn, dadbaa sidaas ku dooday.

HAWIYE isagana Dhulka ayaa la dhihi jiray sida Kutubada ku qoran , waxaasna waa iska

macluumaad dul kaxaadis ah doodaas hada kahor ayaan ku balbalaariyay qoraaladii cinwaankeeda ahaay ZEEYLAC-BAALI sanadka 2023.

-SIYAASIGA Bulshada waa kala dilay waan ogsoonahay.

CAQIIDADA ama DIINTA iyadana Dadka weey isku soo dhaweysaa ama weey kala fogeysaa.

ABUU JAHAL & Nabi Muxamad

anigaa Nabiga uga sokeeyo , balse Qureeysh nimada waa halkeeda.

=Nabi Muxamad maqaamkiisa anigoo meel uga dheceeynin
ma nusqaamo Nuurkiisa

Balse hadii oow yeeli lahaay sida walaalkiis Nabi Muuse ah
yeelay

Una soo hijroon lahaay dhulka XABASHIDA

Waxaa IMAAM u ahaan lahaay NAJAASHI

Nabi geena kuma qabsan leheeyn madaxnimo Aduunyo
magaalo la maamulo maqaam sare uma arkeeynin.

-Dadka qaarkiis IMAAM nimada weey milqiyeen .

ADUUNKA hadeer waaba ka guurayaa IMAAM la kala dhaxlo
ama Boqornimo, waxaana loo guurayaa .

DOORASHO =BULSHADA oo la shukaansado waaye. marka
aad rabtid in aad gabar shukaansatid hadalka lagama bilaabo
hebel & hebelka kale ee aad la haasaawdid ayaa necbahay balse
hadal macaan ayaa lagu soo xero geliyaa hadhoowna hoowsha
guriga taalo laguma hagrado.

Hidadiilo ayaa la geliyaa qalbigeeda, Hantida aad siin doontid
hadii eey kusoo raacdo ayaa looga siisheekeeyaa.

Waxaa taas lamid ah Gobol walba waxa oow u baahan yahay in
loo hagaajiyo ayaa lagala hadlaa Bulshada .

tusaale: Joowhar ilaa Jalalaqsi (HIIRAAN) biyaha Webiga ayeey ku dhiban yihiin, Biyahaas idin maasheeyay ayaan idinka moosayaa, ayaa hadal laga bilaabaa hadii aatahay murashax. Jidadka xiran kasoo biloow Kismaanyo ilaa Kuunya baroow ayaan xoog ku furayaa, ayaa shacabka lagala hadaa balse hebel ayaa necbahay bulshada laguma shukaansado.

Tuulo walba waddo laami ah haloo dhiso balse Garoon-Diyaarad ku soo degto yaanan la dhagax dhigin berina la dhamees-tireeynin waxyaabahaas wax qabad ma ahan. Bulshadeenna wax eey baabuur ku raacaan ayeeysan heeysanin. (Gabaygii Buurfuule "muudeey qaam iska baar...)

Diyaarad Cirka ordeeyso lacag eey ku raacaan ma heli karaan. maanta amni darro ayaa ku qasabtay.

intaasna waa qish aan siinaayo Murashaxiimta .

-Muqdishada-cusub, Garoonka loo dhagaxdhigay waxaan jeclahay inoow ahaado mid yar oo 50 diyaaradood loogu talagalay, Diyaaradaha qaadka iyo kuwa rakaabka gudaha lagu weeciyo halkaas.

Waddooyin waa weeyn oo halkaas aadana haloo sameeyo . aqliga siyaasiga ha koro.

Bulsho rabto in qof walba Baabuur ugooni ah ku socoto,
Basaska aanan maal gashaneeynin ma noqon karno kuwaas.

#1000 sano kahor HIIRAAN iyo BUULA BURDE &

Webi Shabeelle meesha leey ku yiileen. Buulaburde=Burdaha Nabi amaanka

ah ayaa loogu magac daray.

Wiil walba oo wadanka dhib ku haayo waa sida xaaqinka isagaa
dhamaanaayo, Mooryaantii 1990-2005

weey daaleen weeyna dhigeen hubka, Mahad karataay
maalmo ayaa u harsan.

kuwii isaga kahoreeyay Rabi ayaa soo hanuuniyay

Rabigaas dhankiisa lagama quusto.

isagaa Quraanka ku yiri

(ina macal cusri yusran)

=====

=====

#Qalafsanaanta Reer Qorax udhac.

Shalay ayeey eheeyd marka laga xoreeyay Madoowga Koonfur
Afrika.

Banbo weeyn ayaan idinku ilaalinaa Bulshada Falastiin

qaarna gaajo ku dila inta kalana xabad

weliba Aduuunka oo idin arkaayo.

Bulshada Reer Yurub sida berigii hore maahan oo maanta

indhahooda ayaa furan Qalbigooda ayaa uqiirodo

INSAANIYADA

Qarashka eey canshuur ahaan doowladooda usiiyeen in Ilmo

aanan waxba galabsanin lagu laayo midaas raali kama ahan.

=Marka ARGAGIXISO wax soo haleeyaan ISLAAMLKa ayaa
dusha laga saarijiray.

=Shalay marka eey XAMAR kala xirneeyd

xaafad walbana isbaaro tiilay

HAWIYE ayaa dusha laga saarijiray, heer marka danbe

Hawiyaha midkiisa cayilan la canshuuray, waad cayishay
darteed.

Mooryaan uleeyayaal ayoow Eebbe usoo diray

SHARIIFKA & Sheeq XASANKA hada noo xiran
ayaa Xamar ka xoreeyay mooryaantaas .

Soomaalida inta qalbiga fayooow weey qanacday, oo
garoowsatay in HAWIYE xumaan raali ka aheeyn .

Reer galbeedka dhamaantood hal qooyis ma ahan balse waa Umado isku qofolan mar dhow ama weey xoreeynayaan Bulshadaas dulman ama sidii hore ayeey ku laabanaayaan oo aheeyd GUMEESTE.

aqristoow ku xisaabtan Aduunka badaw maahan maanta , sida la ahaay 1700, 1800,1900.

Bulshadaas dulman qaabka wax loogu qaban karo qeeybta sare ayaan ku qoray cinwaanka
#WAXQABAD.

#Dagaal 3-aad

inoow dhaco Bulshada aduunka diyaar ma utahay ?.

Shaly beey eheeyd marka Umadaha wada dhigeen AFXIRKII Cudurka Karoonaha leeskaga difaacaayay.

bal waxaad qiyaastaa xili kuleeyl daran jiro qof walbana ku lebisani yahay Bac jirka ka difaacdo SUNTA marka Wershedaha SUNTA soo saaro laga shaqeeynaayo.ama Kiimikada.

Shinidda malabkeeda marka loo socdo in la sooliso, dharka
laxirto xiligaas ee kaa difaaco qaniinyada Shinida.

DUMARKA Reer Yurub hada ayeey Xijaabka ku dhibqabaan
Bulshada Faransiiska ee Muslimka ah
tiro ahaana gaartay 10 milyan
ma xamilikarto xijaabka.

bal qiyaas adigaba Gabadhaas walaasheed mida aanan weli
Muslimka noqonin iyadaas oo loo geliyay BACDA aan kor
kusoo xusay.

-Wadaadka Muslimka ah xiligii KAROONAHHA ayaan
baranay isaga waa QADARI.

Afka ka xiro KAROONAHHA ayoow diidanaay, iska talaal
hadii ladhaho waxoow dhahaayay talaalka isagaaba cudur ah,
dabcan waa axmaqnimadiisa , dawana masoo saaro mida lasoo
saarana, sasboow ka qabaa.

Qoomka nuucaas ah BACDAAS kulul inta eey dhex galaan
maku dhex noolaan karaan.

weliba xili kuleeyl lagu jiro?.

=miskiin la xiiqsan Umadda meey badato, maqaalkaan kuuma sooqorin.

Oday 4 xaas ah guursaday hadana ubadka oow ka dhalay dayacay , una hanqal taagayo in oow 4 kale soo guursado waxba ma dhaamo , qofka Muslimiinta maanta nool wax u qabad kooda aanan ka fekereeynin balse maankiisa oo ithil ku mashquulsan Xaasaska soobadi.

-1400 sano kuwii Muslimka ahaay ayaad wax uqaban weeysaye, GAAL hada soo islaamay maxaad uqabankartaa.

-GAAL soo ISLAAMAAYO hada kadib qof u hamuunqabo ma ihi.

-NABI MUUSE markoow Dalka Masar ka raraayay Qoomkiisa qalbi ahaan waa ka quustay in eey soo islaamaan Masaarida, ha qoslin oo ha is dhihin maxaa keenayo in Gaalka laga quusto , Nabi Nuux ayaa ka quustay , Nabi Muuse isna waa lamid.

Muslimiinta inta eey ku mashquuli lahaayeen Gaal la gaarsiiyo Diinta, Bulshadeena , Bangaaladeesh, Induniisiya, Hindiya, Masar & inta madax madoow ee Muslimka ah, wax tarkooda halagu mashquulo.

Masiixiga isagana talada aan siinayo waamidaas mid lamid ah waxba haku xiiqin Qof Muslim ah gaarsiinta Diinta Masiixiga, wax badan ayaa kaaga halaabay kuna habsaantay Guriga Muslimka.

Dadka Dunida ku nool ,Masiixi ayaa ugu badan Muslim ayaa ku xigo, Diinlaabe ayaa kusii xigo ama weey wada simanyihiin duuduub ahaan.

Masiixiga tiro ahaan haduu yar-yahay waxaa xaqiiq ah dhulka ugu badan ADUUNKA in eey iyaga degan yihiin , Qaarada AMEERIKA, RUUSHKA, YURUB.⁽¹⁾ dhulkaas aadka u balaaran Dadka degan waa iyaga.

=Dalka HINDIYA MUSLIMIINTA ku nool ayaa ka badan Mareekan, balse laguuma sheegin arinkaas waayo FAQIIRKA lamaba soo hadal qaado, balse Taajirka ayaa dadka la baraa.

=Muslim&Masiixi&Nabada Aduunka.

nabada Aduunka halaga shaqeeyo Buunkeeda hadii la yeeriyay = waa idinka Dadka ugu badan ee ku durnool Aduunka.

=====

(1)Aakhir zamanka xiliga oow dhacayo Dadka ugu badan waa ROOMAANKA=RUUSH, YURUB, AMEERIKA.

Imaam Muslim ayaa qoray sidaas.

Ninka loosheegay hadalkaas waxoow yiri

akhlaaqdooda ayaa hagaagsan.

miskiinka oo wax lasiiyo,Agoonka oo loo gargaaro, musiibo hadii eey ku habsato durba weey kasoo kabtaan,fitno hadii eey ku dhacdo dulqaad ayeey muujiyaan.hadii eey dagaal ku jabaan durba weey soo rogaal celiyaan sidaas ayoow ku macneeyay Saxaabiga maqlay xadiiska , balse xusuusnoow hadalkaas waa war saxaabi sheegay balse hadal nabiga yiri ma ahan .

waxaan ka qaadan karnaa in AKHLAAQDA suuban ku dhaqan keeda lagu dadaalo, hadii Masiixi lagu amaanay

Muslimka ayaa wacan in oow ku lebisto dharkaas quruxda badan ee ah ku dhaqanka AKHLAAQDA SUUBAN.

=====

-DIMOQORAADIYADA sida Shuuciyada, Dadka weey siinacayaan.

Canshuur kaqaad dadka Qiyamka Aadanaha ha ilaalinin codka isiiya dheh

Hadhoowna wax eeysan Bulshadaada raali ka eheeyn ku dhaqaaq, taasi waa mida Yurub iyo Mareekanka taalo maanta

Maati la xasuuqaayo Madfaca ku taageer, Miskiinka gaajeysan
dheh Gaaweeto soo qaado iikaalay kadibna Madfaca la dhac
CARUURTA.

Muslim ahaan HUBKA WAX GUMAADO
waan heeysanaa.

Masuuliyad ayaana naga saaran NABADA- ADUUNKA.

NABADA ADUUNKA

1980-kii

xiligaas ayeey dadka qaarkiis sheegaan in
Reer Galbeedka & RUUSHKA ku hishiyeen
in hoos loodhigay Hubka Sunta ah, Gumacyada
diyaarka u ah in lageno.

Dal walba in oow Hubkiisa kala furfuro ayeey ku heshiiyeen.

SANADKA 2020 wixii ka danbeeyay

Dib ayaa Wershedaha Hubka lookiciyay sida Idaacadaha soo
tebiyeen Warbaahinta Aduunkana hadal heeyso.

=inaga Soomaali baanahay mana heeysano Hubka
SUNTA ah maxaa naga quseeyo warkaas?.

<jawaab>

=Cudurka Karoonaha kolkoow kadilaacay SHIINAH

Dadka Dunida ku nool badi waxeey dhahayeen waa cudur yar
oo hal meel ku kooban, SHIINAH ayaana ka adag. balse
Aduunka ayoow ku wada faafay.

Dadka dunida ku nool, hal TUULO ayeey ku wada nool yihiin ,
SUN hadii la rido , ha maleeysanin in eey joogeeyso halkeeda.

=Dimoqoraadiyada Xalaasha ah & Diinta Muslimka &
Masiixiyada.

Hoos udhac ayaa ku yimid Dimoqoraadiya
oo xiiso looma qabo sidii hore maahan.

Munaafaqada oow siyaasiga ku dhaqmaayo ayaana lagu nacay.

-fadlan Codkaaga isii, haleey doorto walaalayaal , hadhowna
hadalkaaga, mid maqlaayo maba ihi, balanta aan kula galay
waan buriyay

Been baan kuu sheegay kolkaan murashaxa ahaay
arimahaas ayaa lagu nacay.

1700 -1800-1900.

Xiliyadaas ayeey soohana qaaday, asal ahaana waxeey eheeyd
mad-habta ugu liidato ku dhaqmid markeey timaado , midaasna
AFLAADHOON ayaaba ka waramay.

=====

=====

#AAKHIR ZAMANKA miyaa soo dhaw?

QOF XIISEEYO MABA IHI WAXA DHICI DOONO

Mustaqbalka saadaalinta arimahaas.

balse maanta waxaan baarayaa in eey Diinta sheegtay Doowlad
Yahuud leedahay in eey QUDUS ka talin doono markaas
kadibna QIYAAMAHA la gaari doono.

-Duuduub ahaan Nabi Muuse diin ayoow dhanka Eebbe ka
keenay dadkiisana weey rumeeyeen.

qaar iyaga ka mid ah Kutubkii ayeey sooqaadeen Qoomiyado
kale ayeeyna u keeneen

waana laga aqbalay, qaar Qoomiyadaha ka tirsana weey iska
diideen.

-Nabi Ciise sidookale Xertiisa waa iyaga kuwa Diinta gaarsiiyay
ROOMA

balse Nabi Ciise Xertiisa ma eeysan dhihin Buugaan naga qaata
Beerahiina iyo Dhulkiina nagu soo wareejiya.

-Nabi Muxamad jidkaas Nabi Ciise qaaday
oow maray isagana oo Qoom Dhulkooda laga boobay ayaanan
jirin.

Masaarigii shalay Masiixiga ahaay ayaa maantana Muslim
noqday.

SUURIYA & YEMEN sidookale.

Soomaalida ayaa lamid ah, Quraan ayaan idiin wadnaa ,iyo
waan idinka qaadanay
ayeey sheekada eheeyd, balse Qoomiyad kale nama eeysan
qabsanin.

=sheekadaan maxeey muhiim u tahay ?.

Dadka waayadaan danbe waxeey dhahayaan

Aakhirzaman ayaa soo dhaw waxaa dhici doono

hoogii lasheegi jiray, si hoogaas loogaaro

waxaa kamid ah Doowlad YAHUUD leedahay in la helo

markii lahelu kadib ayoow Nabi ciise soodegayaa.

Tusbixii tixnaay , taariikhda Nabiga sii sheegay ayaa halkaas ka bilaabaneeyso

YAAJUUIJ&MAHDI, JIDAAL ILEEY.

Dadkoo dhan weey wada dhimanaayaan wax yar oo Nabi ciise la socdo

Buur ayeey dul kori doonaan , sheeko sidaas udhigan ayeey
SUUFIGA & REER AALA-SACUUD Dadkeena u aqriyaan
SHIICADA iyagana waa lamid.

CALMAANIGA

waxoow la fajacsan yahay waxaas eey ka qisoonaayaan
Wadaadada labada dhinac u qeeybsan.

CALMAANIGA YAHUUDIGA ah

CALMAANIGA , MUSLIMKA AH

CALMAANIGA MASIIXIGA ah

Afka inta gacanta saarteen ayeey la yaaban yihiin waxaas eey
wadaadada ka waramayaan.

-Sanadka, 2009 wadaad Masaari ah laguna magacaabo

XASAAN waxoow hawada kusii daayay

SIL-SILAD oow kaga hadlaayo AAKHIR zamanka waxa dhici doono

Netka waad ka heli kartaa, Daawasho ahaan magaceeda waa "AXDAASUSAACA"

hadii aad xusuusatid 2008 si xun ayaa loogalay Shacabka Falastiin wadaadka waxoo islahaay Aduunyo gadoonka ayaa sidaas lagu gaari rabaa.

30 xalaqo ayoow Filim ahaan usoo duubay, Axaadiistana waxoow soo uruuriyay kuwa xigasho ahaan aadka u hooseeyo, Aayadaha Quraanka kuma badna warkiisa , aniga koleey waan daawaday kumana qancin hadalkaas, lama saadaalin karo xiliga Buunka Qiyaamaha layeerin doono.

Quraanka waxoow sheegayaa

(ina macal cusri yusran)

=DUUDUUB uqaado Quraanka kuma qorna Doowlad
Soomaali leedahay ama mid Yahuud leedahay oo jiri doonto
xiliga Aduunka la burburinaayo.

mid Carbeed ayaanan la sheegin ama mid YURUB laga
leeyahay, ama mid Eeraan leedahay .

Qoomiyad walba oo Masiixiyadda qaadatay ama Diintii Nabi
Muuse Qolo walba inta wax isku qofoshay ayeey Quraanka qiil
uga raadsatay.

xitaa waxeey dheheen Xabashi ayaa Kacbada soo weerari
doonto.

malaha weey dhacday midaas waana xiligii Cumar noolaay
dhoowr Doomood ayeey ku weerareen Sacuudiga , qoladaan
Yahuuda ah iyagana Taariikh Rabi ka waramay oo horay uba
dhacday ayeey doonayaan in eey ka dhigaan wax aanan weli
dhicin .

waxeey lamidtahay midaas Nabi Muxamad weli Kacbada kama
qabsanin Qureeysh.

(inaa fataxnaa laka fatxan mubiinan)

Taariikhdaas weli ma dhicin qof sidaas aaminsan in oow jiro ilama ahan.

-Qoladaan iyaguna dagaalo eey horay ula galeen Eeraanta xiligii FURUS gaalada ahaayeen ayeey hada waxeey doonayaan in eey ka dhigaan wax Diinta sii sheegtay
aanan weli dhicin.

#Aakhiro ZAMAN

3 aragti ayeey dadka ka qabaan

1- Dadka dhamaan waxeey noqonaayaan walaalo is wada jecel nabad aduunka wada saameeyso ayaa lahelidoonaa

waxeey dhahayaan kuwaan, dhiiga hala joojiyo, nabad halagu wada noolaado.

Aduunka Hubkaaan baas halaga zuuliyo.

Nabi Ciise ayaa imaan doono, Nabada marka lahelu ayoowna imaanayaa.

HEESTA: Lafoole qaado.

waa mid ku haboon halkaan in lagu xuso.

SOODHALO YOOYO.

hadhibin Hooyadaa, hadhibin hooyadaaye soo dhalo.

meel dhalaanka lagu dilo ku dhalan maayo

dhiigiyo colaadaha ku dhalan maayo

dagaalada dhexdiina ah ku dhalan maayo

dhagartiyo wax yeelada ku dhalan maayo .

qoladaas waxeey aad uga shaqeeyaan INSAANIYADA.

Dadka hala daryeelo ayeey dhahayaan , Diin walba ayeeyna
leeyihiin

waxaan dhihi lahaay waa SAXWO INSAANIYA.

Qolada 2-AAD

waxeey dhahayaan

Dhiig badan hala daadiyo si loo gaaro AAKHIR ZAMANKA

xitaa dhagxaanta guba , waa mida dhashay Shacabka

FALASTIIN in Madfaca lagu karsado

Hub walba oo Bini aadanka ka anfariiro ayaa loo adeegsaday si
Aduunka looga dabarjaro

qaabkaas ilbaxnimada ka aradan ee loola dhaqmay Bulshadaas,
Reer galbeed kaliya ceeb kuma ahan balse Bashar dhamaantiis
ayeey caay ku tahay .

TATAARKA waxeey ahaayeen qoom aanan wax ilbaxnimo ah
horay usoo marin.

hal mar ayeey sida hirka sookaceen Aduunkoodhan wada
saameeyeen inyar marka laga reebo.

1-Buug oo cilmi ADUUN ama Cilmi aakhiro ka hadlaayo
lagama dhaxlin qoladaas balse Webiga FURAAT& DIJLA
ayeey Buugaagtii ku wada shubeen .

-Qoladaan hada Qudus qabsatay qoladaas ayeey isku dhaqan
egyihiin .

Qolada 3-aad.

waxeey dhahayaan Qiyaamo ayaa dheceeyso Aduunka ayaa la
rogayaa waxaas waa quraafaad

nabi Ciise ayaa soo degaayo maba aaminsana , kuwaas waa
qoom CALMAANI lagu sheegay

Muslim iyo Gaalo ayee iskugu jiraan.

waloow meelaha qaar eey isku qilaafsan yihiin balse Nabi Ciise
imaan shahiisa looma fadhiyo ayee ka mideeysan yihiin ,
Jadaal cawarna warkiisaba daay, Mahdiga waxaas Shiicada iyo
qaar Suni ah ayaa aaminsan .

#AKHLAAQDA WAX BARASHATHA.

ANSHAXA WAX BARASHO.

HEESTA , Maxamd Mooge oow qaatho.

waxaan ahay waadiga dugsiyada

waxaan ahay waanada macalinka

waagii baryaba ubax laga waraabshoo

waxan ku werwereeynaa wadankiina wax ubarta

oo xanbaara waajibkiisa

wahsan meeyno

waaban meeyno

warwareegi meeynoo

weeweecan meeyno

Guul wacan

cadaw ha waabto

Nolol wanaagsan

iyo barwaaqo

nabad lagu wadaagooo

haku waaro Wadankeenu

wadankeenu waa

wadnahii jidhkeena

waraabinaayay dhiigoo

waan ku wardiyeeynaa

Markeey tahay Wadaniyada.

DALKA oo ladifaaco, Nabi Daa-uud ayaan uga deyanaa.

Ardaygana waajibkiisa waa in oow guul ka gaaro wax
barashada.lacala kaba sooqaad xili oow dagaal jiro, ama cudurka
safmareeynka

in loo baahday dhaqtarnimo , hada ayaan ardaynimo dib ugu
laabanaa, casharka aan shalay sagsaayay ayaan dib
usaxayaa xiligaas looma baahna.

- Injineerka dhiso Guryaha ama Fuundinimo ayaa lagu baray,
balse QISH ayaad ku heshay Shahaadada

Hargeeysa ayaad ka dhistay Guryo 5 dabaq ah.

Bulshada ayeey kusoo duldumayaan guryahaas

ileeyn qiyaano ayaad wax ku baratay , Nabiga waxuu yiri qofkii
fatwo bixiyo sidaasna

qof ku dhinto isaga ayaa ka masuul ah .

qisadaasna waxeey ku dhacday qof xanuunsan ayeey dheheen,

in aad qubeysatid ayaa kugu waajib ah

isagana hadalkooda ayoow maqlay markoow biyo qaboow ku
qubeestay ayoow sidaas ku dhintay.

waxbarashada hadeerba daacad , haloo ahaado.

har&habeen u soo jeeda wax barashada.

Hooyo & Aabe Soomaaliyeed ayaa

dawo siindoontaa, ama Ubadkaaga ayaad wax uqabandoontaa

hadii aadan Dalka wax tarin, adiga ayaa naftaada wax teridoono.

=====

#=AHLAL-QURAAN<

(Hal unabi`ukum calaa man tanazalushayaadhiin)

(tanazalu calaa kuli afaakin athiimin)

Shayaadiinta kuwa eey kusoo degaan ma idiin sheegaa xog ma idinka siiyaa

waxeey kusoo degaan beenaale kasta oo denbi badan .

-hore ayaan usheegay FIRCOOWN in aan ku been abuurano

waxoowsan falin dusha ka saarno ayaan iska diidnay

Dad waxaan arkaayay (CD, MP3)Qoraal lasoo jar-jaray

Sawirr labeen abuuray ama ujeedka Sawirka loogalay ujeedo aanan aheeyn loo adeegsaday.

-Caayda Culimada SHIICADA , ama Culimada SUNIGA ah.

-been ka sheegida qofka, ujeedkuna yahay DIINTA u hiili uguna hiili been ka sheegida qolada kale.

-xogta la been abuuray.

-Taariikhda oo laga been sheego ,xogta sida eey u qorneeyd wax laga bedelo.

(yu xarifuunal kalima can mawaadicihi)

-Dalka uhiili Qoomiyada Oromada ama Soomaalida wax eeysan suubiyin dusha ka saar.

-Gobolkaaga u hiili, Gobolada kale kala dilkooda ka shaqeey.ama Qabiilkaaga u hiili uguna hiili ku been abuuradka Qabiilada kale .

=Sheeydaanka Qofka oow u waxyoodo

ee Quraanka sheegaayo aan qoraalkeeda idin siiyo.

-DENBI FALE WALBA OO BEENAALE AH

ayoow sheeydaanka qalbigiisa kusoo degaa waxna usheegaa.

AFTAHAN waaye, waana ABWAANKA GABYO.

Aayadaas Quraanka ayaa ku hortaalo.

Salaada maku qushuucday QALBIGA maka ooysaaa.

Xiqdiga , xasadka,xanta,naceeybka qofka Muslimka qalbiga
loogu haayo

OROMADA, CANFARTA,SOOMAALIDA.

nadiif maka tahay necbaanshahooda, kadib ayaa Qalbigaaga
Malaa`ig dhex degi kartaa.

sida Nabi Muuse Hooyadiisna Kheeyrka lagugu ilhaamin
doonaa.

(laa yamasuhuu illaal mudhaharuun)

kuwa qalbiga ka dahiray xumahaas ayaa loola jeedaa balse
Biyo lagu fooldhaqdo kaliya maahan .

Quluubta kuwa ka weeysa qaatay ayeey Aayada ka hadleeysaa.

-intaas oo xumaan ah hadii eey Qalbigaaga kabuuxaan

Soomaalina wax uma gashid Oromana xaq uma sheegi kartid

-Qalbiga xumaanta la daxaleeystay ayoow dhex harsadaa

SHEEYDAANKA qofkaas ayoowna wax usheegaa.

=====

#TAFSIIRKA & SAWIRLAHA./FARSHAXAN.

Ubaxyo , Geedo quruxbadan ,Dalaga bislaaday Sawir ahaana
aadka uqurxoon

waxyaabahaas hadii aan sawiradooda inta soo uruuriyo

Bulshadeeyda la wadaago

sidaas miyaan ku ahay SAWIR qaade fiican,mise waxaanba ahay qofka soo hindisay kaamirada.

KAAMIRADA waxeey lamid tahay Qalinka, mid walbana waxoow qiime yeeshaa hadba waxa quruxda badan oow kuusoo bandhigaayo.

(Nuun wal qalam...)

Kaamiradda waxeey sawiri kartaa waxa adiga kuu muuqdo FARSHAXANKANA waxoow SAWIRI karaa waxa Qalbiga ku dhex sawiran.

waxaas wax qurux badan ayeey noqon karaan ama wax aad u fool xun /shar uruurtay.

-TAFSIIRKa AAYADAHA Quraanka.

Tafsiir Ibnu kathiir, Tafsiir Beeydaawi,Tafsiir Al-MANAAR.Tafsiir Al-kashaaf.Tafsiir Al-maaturiidi.

intaas oo Kutubo hadii aan kuu soo jarjaro

Nin walba waxa oow ka yiri Aayada hadii aankuu soo qor-qoro sidaas miyaan ku ahay Qof Quraanka TAFSIIR usameeyay?.

qofka sidaas sameeyo waxaa haboon in oowsan dhihin aniga
ayaa Quraanka fasiray balse waxaa haboon in oow dhaho
waxaan idinla wadaagayaa
waxa Kutubadaas ku qornaay oo aan soo koobay ama kasoo
minguuriyay
qofkaasna waxoow lamid yahay SAWIRRO qof soo uruuriyay
balse aanan isaga
waxba sawirin .

1) Abwaan GUURE .

hadii aanku hadal qabsado , Xeebta Banaadir hadii oow tago
kana tiriyo

Gabay oow kaga hadlaayo BADA

waxoow lamid yahay Nin wax sawiray , ama ka sheekeeyay
BADA.

waxa oow ka sheekeeynayo waa wax isaga u muuqdo balse
qofka ^{MP3} ahaan u dhageeysanaayo GABAYGA aanan u
muuqanin .

waxaas laga sheekeeynaayo waa BADA.

Wiilka BEEYDHABO ku korayne weligiis BADA ma oowsan
tegin

waxaa suuragal ah in oow uba maleeyo BADA Biyaheeda

makhluuq fuuqsan karo inoow jiro.

YAAJUUI ayaa jiro ayaa loogu sheekeeyay ileeyn.

ama waxaa suuragal ah in oow ku fekerro BADA biyaheeda

BAAQULI laga buuxin karo

kadibna banaanka looga daadin karo Dunidaan aan dul

noolnahay.

dabcan Biyaha Bada wax sahlan maba ahan

Quraanka ayaa ka waramay

(wa ithal bixaaru fujirat)

(wa ithal qubuuru bucthirat)

Rabi waxoow yiri Bada waan ololin doonaa

marka Qiraamaha loo dareeri doono

Qabuurahana laga soo fuuciyo dadka.

waxaa suuragal ah in eey hadeer naguba socoto

midaas, Qoraxdaan aadka usii kululaaneeyso

waxaa suuragal ah Badda in eey uumibaxdo kuna dhamaato

sidaas.

Digbsi Debka saar kadibna Biyo kabuuxi, cabaar hasaarnaado

Biyahaas eber ayeey noqdaan

sidaas ayoow kadhigayaa Eebbe,
Biyaha Badda weey baa`ba`aayaan.
(wa ithal bixaaru fujirat)

2)Abwaan GUURE

hadii aan ku haqabsado , Xeebta Banaadir hadii oow tago kana
tiriyo

Gabay oow kaga hadlaayo BADA

waxoow lamid yahay Nin wax sawiray , ama ka sheekeeyay

waxa oow ka sheekeeynayo waa wax isaga u muuqdo balse

qofka MP3 ahaan u dhageeysanaayo GABAYGAAS

uma jeedo BADA oow Abwaanka ka tiriyay GABAYGA

Qofkaas hadoow ku nool yahay BEEYDHABO. ama

BELEDWEEYN.

Quraanka EEBBE

waxoow lamid yahay BADA.

qeeyb yar ayaa laga soo minguuriyay

ku saabsan Nolosha Aadanaha iyo qisooyinka .

Janada waxa dhexyaalo & Naarta silaca yaalo ayaa

looga sheekeeyay .

RABI & JIBRIIL & NABIGA & DADKA.

Quraanka waa sida Ileeyska

waxoow soo dhexmaray Jibriil, Nabiga ayaa lagu iftiimiyay

isaga ayaa Umada usii iftiimiyay

sida Abwaanka uga sheekeeyay Bada ayoow Jibriilna uga

sheekeeyay Quraanka

cida oow u sheegayne waa NABIGEENA , isagii waxoow usii

sheegay Umadiisa waana inaga

CUSMAAN Bin Cafaan isagana waxoow nooqoray

MUSXAFKA.⁽¹⁾

(wamaa kaana libasharin an yukalimahu laahu ila waxyan oo min waraa`i xijaabin)

Dad ahaan ,waxaa naga mid ah qaar aanan waxba arkin , qaar aanan wax maqlin

kuwaasna Rabi uma abuurin in oow ceebeeyo balse waa ku

cibro qaadasho , AKHLAAQ ahaan

waxaa la eegayaa waxa aad uqabatid Dadka iinta leh ,iyagana

waxaa haboon in eey raacaan

inta ILEEYSKA loodhiibay inta wax arki karto, inta wax maqli karto.

(sumun bukmun cumyun fahum laa yacqiluun)

"indhaha qalbigaa ka eegmo fog"

Dhaqtar KUULE waa dhaqtarkeenii ILMAHA

taqasus kiisa ayaana ahaay daaweeynta cudurada ku dhaco

ILMAHA,

hadoow ijtihaado isagoo adeegday cilmiga caafimaadka ee lasoo

baray kuna kooban

JIRKA sida loo daweeyo , ajar ayoow Eebbe ka siinayaa .

90%

haduu wax walba saxay wax yar oow qalday cilmigiisa looma

wada tuuraayo

Qabrigiisa Allaha u iftiimiyo Dhaqtarkaas,

isgoo kale Eebbe hanoo badiyo,

waxaa nahay Bulsho badawnimada ku faanto, waana jahliga oo

lagu faano. cilmi caafimaad ku saabsan dhaqan Soomaali inta

laga qaadan lahaay DHAQANKA GIRIIGA in laga qaato ayaa

Diinta Islaamka u dhaw , waxeey dheheen "Qof buko boqol

utalisay" waa xigmad jiran midaas , Qof buko dhaqtarka

cudurkaas ku taqasusay ayaa u taliyo, waana sidaas diin ahaan

iyo aqli ahaanba.

xusuuso Nabiga :qisadii Ninka jiraday ee qubeeyso la yiri kuna dhintay sidaas , qofkii fatwoday ayaa dilay qofkaas.

-Cilmiga SIYAASADA , wax IDAACADAHA ama TV-YADA laga barto ma ahan waa CILMI JAAMACADAHA lagu dhex barto, midka aanan awoodina Buugaagta ayoow ka dhex boowsadaa isagaa is baro.

hal qof in Fatwo lagu dilo hadii la diiday, masiir Umadeed ayaan kala miisayaa TAQASUSNA uma baahni waxeey lamid tahay qof buko boqol utalisay.

--

SHEEKADAAS aan halkaas kuugu qoray

<RABI & JIBRIIL & NABIGA & DADKA>

Mufasiriinta kama aanan soo minguurinin

aniga ayaa wax kuu sawiray oo Qalin wax kuugu sawiray hadii aan wax qalday

waxaas aan qalday qaabka aan usixi lahaay Rabi ha igaradsiiyo

hadii aan wax saxayne Ilhaamka Eebbe ha inoo kordhiyo

dhamaan ARDAYDA jecel Quraanka

AHLAL-QURAAN dhamaantood.

=====

.(1)Quraanka ayoow Cusmaan qoray maxaa loola jeedaa?.

Doowladii KACAANKA Afsoomaaliga ayeey qortay xuruufta Laatiinka

ayeeyna adeegsadeen Xuruufta Carabiga ayeeyna ka guureen oo waraaqaha leeskugu qori jiray waagii hore sida hadeerba tahay Eeraan iyo inta lamidka ah ayaana lahaan jirnay, Cilmi boodhari waatuu ku gabyay *Berbera waan udiri lahaa duub waraaqado ah* , Boodhari warqada waxa oow ku qori jiray, xuruufta oow adeegsan jiray 1950-kii Af carabi beey eheeyd.

-kasoo deg moowduucaas una kaalay Cusmaan maxoow qoray?.

Albaqra waxeey ku xigtay Ancaam,Maa`idana waxeey ku xigtay Axzaab.

tusaale ahaan sidaas ayeey ahaayeen Suuradaha Quraanka, kadibna isaga iyo Culimadii kale waxeey isla garteen in sidaan Suuradaha loo kala hor mariyo. waaweeynka hal meel la geeyo yar-yarkana halmeel .Suurada Anfaal ayaa laga shakiyay in eey kamid tahay Towba kadibna halkaas ayaa laguugu qoray ,moowduucaan marbaan si gooni ah qoraal uga sameeyn doonaa.

intaas kooban socodka ku sii aqriso qoraal dheer oo fadhi lagu aqristo markale ayaan qori doonaa.

=====

#AHLAL QURAAN.

(aqristoow ka raali noqo waqti badan kuma bixinin soo diyaarinta arimahaan ku saabsan, waxa dhici doono AAKHIRZAMANKA..Anshaxa ayoow ku saabsanaay Maqaalka moowduucaana maba ahan mid eey xiiseeyaan Dhalinyarada , waayo qofka da`dayar waxoow jecel yahay MUSTAQBAL IFAAYO , in looga sheekeeyo, balse halaag ayaa soo socdo ama habaarka wax la xiiseeyo ma ahan.Quraanka ka daalaco Juzcama ayaa looga hadlay wax ku saabsan Aduunya gadoonka, sidookale suurada Al-xaj bilowgeeda. qaab jacbur ah hadii aan u qoray,aqristaha hakaga nasto moowduuca ku saabsanaay AKHLAAQDA ayeey igatahay)

#AHLAL QURAAN.

Aayada:

(latufsiduna fil ardi marateeyni)

[Reer Bani- israa-iil.]

Rabi waxoow noosheegay in eey laba jeer Aduunka fasahaadin doonaan , qormadaan waxaan ku lafa gurayaa labadaas jeer ee Rabi sheegay wax lasoo mary miyaa, mise waa Taariikh dhiman oo aanan weli dhicin?.

marka 1-aad

xiligii Dibiga la caabuday

ayoow Rabi ula jeedaa. Aduunka ayaad fasahaadin doontiin.

(qad fatanaa qoowmaka .. wa adalatum alsaamiri..)

marka 2-aad

waa xiligii Nabi DAA-UUD

marka oow dagaalka gelaayay xiligaasna Dalka dhamaantiis

ayaa laga wada qabsaday

sababta dhibkaas ugu dhacayne Quraanka ayaaba ka waramay
KHAWAARIJ ayeey noqdeen

dhexdooda ayeey kala dhamaan waayeen
dhiig baneeysi ayaa u dhaqan ahaay.

AXDIGA eey la galeen Eebbe weey ka bexeen balantaas
Axdigaasna, aayadaan ayaa ka warantay

-Baqara,84-85

(wa ith akhathnaa miithaaqakum)

(laa tasfikuuna dimaa akum walaa tuxhrijuuna anfasakum..)

Dhaqan Khawaarij qolada yeelatay ee Magaalooyinka
burburisay sidaan ayoow ula hadlay Eebbe.

(Thuma antum haa ulaa-i tuxhrijuuna anfasakum)

-Kutubka Toowreet waxbaa laga bedelay waa run, lkn
meelaha qaar Quraanka ayeey ka wada simanyihiin.

-Rabi waxoow ugu qoray halkaas " waxaan ku daalay Xoolaha
aad qaleeysiin, Qurbaanka aad bixineeysiin

Gacmahana dhiig baad kula jirtiin , barta nabada , barta hadalka
san."

-Carabta iyaga ayoow ku soo degay Quraanka Rabi waxoow
yiri.

(ajacaltum siqaayatal xaaji wa cimaaratal masjidil xaraam..)

Carabta inta isku duulaan isdilaan ayeey Xajka iskugu imaan jireen kuna ooyi jireen halkaas,Dad ayoow soo dilay hal bil ka hor, maantana Xaramka ayoow biyo ugu qeeybinaa dadka Xajka soo aaday.

Suufiga waxaa suuragal ah in Siyaarada Aabahiis oow aad ugu dadaalo, hadana sanad walba oow duulaan kujiro, jufo-jufo dagaalkooda kaba qeeyb galo. qaar waxaan arkaayay bil Soonqaad iyadoo la soomanyahay dagaalkoodana sii socdo dagaal ku dhisan Goboleeysi,waxeey garan waayeen hala hakiyo dagaalka si Bisha barakeeysan loo xurmeeyo, Qureeysh oo gaalo ah bilaha qaar ayeey xurmeeyn jireen qoom waxaa nahay kaba xishoonin Eebbe xili walba wax soo dil hoowshooda tahay.

= sheekadeenii ayaan halkeeda kasii wadayaa.

-Nabi DAA-UUD ,Kutubka ZABUUR ayaa lasiiyay

Quraanka isagoo ka hadlaayo arinkaas waxoow yiri

(walaqad katabnaa fi zabuuri minbacdi thikri anal arda..

yarusuhaa cibadiya salixuun)

waxaa loogu bishaareeyay in magaalada furaheeda dib loogu soo celin doono.

sida Nabigeena loogu bishaareeyay in MAGAALADA MAKAA
oow dib u qabsandoono.

Nabiga isagoo arinkaas loogu bishaareey-naayo waxoow yiri
Eebbe

(ina ladii farada caleeykal qur aana laraaduka ilaa macaadin=

Maka ayaan kugu soo celin doonaa)

(Inaa fataxnaa laka fatxan mubiinan)

=**Nabi Daa-uud & Quraank.**

Aayadaan Rabi maxoow ula jeedaa?.

(yaa daa-wuudu inaa jacalnaaka khaliifatan fil ardi)

Aayadaas waxeey ka hadleesaa markii Dalka laga xoreeyay
qoomkii kusoo duulay kadib ayaa waxaa loosheegayaa Daa-
uudoow KHALIIF ayaan kaaga dhignay Dhulkii barakeesnaay.

Aayada hore iyadana waxeey ka hadashay ka hor inta aanan laga
adkaanin qoomkii lala dagaalayay.

-Nabi Daa-uud inaga ayaa ehelkiisa ah hadiiaa nahay

MUSLIMIIN

balse kuwaan dooxatada ah, maati goowracyada ah , Madfac walba midka oow ka cusubyahay inta lasiiyo ku xasuuqa masaakiinta layiri.

iyagaas nagama xigaan Nabi Daa-uud.

2008 ayaan ogeeyn , hadeerna weeyba kasii darantahay .

balse 2008 xiligaas Aduunka waxbaa iska bedelay Tignoolajiyad aya ala helay

qofka qaldan Aduunka ayaa arkaayo.

-Aayada:

(wa jacalnaakum aktara nafiiran)

nabi Suleeymaan xiligiisa ayeey aad u bateen

Doowladoonada balaaratay.

labada jeer ee Quraanka sheegaayo waa labadaas mar balse wax hada ka dib dhici doono Rabigeena ulama jeedo Aayadahaas.

QURAANKA hal Qoomiyad si gaar ah wax ugama sheego balse **BULSHOOYINKA** Ifka kunool ayoow duuduub ula waramaa.

-Bulsho walba cadaan iyo madoowba Rabi isagoo la hadlaayo waxuu yiri " Doontii Nabi Nuux ayaan idinku badbaadinay" markaasna Quraanka waxoow la hadlayaa BASHARKA guud ahaan .

=====

suurada AL-ISRAA

waxa ku dhigan dhamaan, xaq maahan in aan duldhigno YAHUUDA aanan dhahno iyaga ayeey la hadleaysaa balse BASHARKA dhamaantiis aan ka dhigno in eeyba la hadleeyso. sidaan ogsoonahay Dhulka waxaa fasahaadiyay DADKA kadibna Rabi inta oow BASHARKA u carooday ayoow Biyo ku furay, Roob mahiigaan ah Albaabada Cirka ayaa biyo lagasoo qubay Badaha ayaa nagusoo butaacay Dad aad uyar ayaana ka badbaaday halaagaas.

(latufsiduna fil ardi marateeyni)

midaas waxaan kadhigi karnaa marka koowaad ee Dadka dhulka fasahaadiyay.

-Marka labaad waxaa laga dhigi karaa midkaan aan hadeer lanool nahay

Dabeeylaha cartamayo Duufaanada dhacayo Debka meel walba
ololkiisa baxayo lana demin kareeynin xitaa suuqyada
Soomaalida Dabkaan holciyay.

Roobka maanta socdaa kii hore lamid maahan,
laba saac ayoow kugu da`ayaa
misane dhulka biyaha ma laqi karo , kadibna
Roobkii ayaa sida Maanyada meel walba mool kadhigaayo
hadii aadan aqoonin sida loo dabaasho halis baad ugu jirtaa
xitaa hadii aatahay mid dabaal yaqaano daadka socdaa waa
moowjad cabir ahaan lagu qiyaasay shandabaq

-Doowladaha ugu awooda badan ee maanta jiro
Debka wax leeskaga difaaco ma heestaan sidookale daadadka.
Dabeeylaha ayaa lamid ah Dhulgariirka kaba daran , shalay beey
eheeyd marka shartiisa aduunka laga ciribtiray cudurkii
KAROONAHHA .

kaas waxoow ahaay Bagteeriyo aad uyar balse musiibooyinkaan
Aduunka wadarta usaameeyay wax ka qabadkeeda waa mid
MUSLIM &GAAL ladoonaayo in eey wax ka qabtaan.
sida wax looga qabankaro waa in colaadaha hoos loodhigo
dhiiga faraha badan ee BASHARKA laga daadinaayo lajoojiyo .

Nabi NUUX hadii oow Dadka badbaadiyay isagoon HUB
qaadanin

Wadaadka Masaajidka dhexjoogo iyo Baadariga KANIISADA
dhexfadhiyo , kan HINDIGA ah

ee BUUDHA ayaan raacay dhahaayo , SHIINEESKA isagana
hakareebin

DOONTAAN lawada saaran yahay, ama weey nala degee ama
waan badbaadineeynaa, hadii aanahay Dadka ku durnool
Aduunka.

-HUBKA SUNTA ah , isagaas hadii oowsan waxba ka qaban
karin musiibooyinka dhacaayo

waxa loosameeystay soow maahan in lagu sumeeyo

BASHARKA.

qof waxaa jiro Bishimaha ka hadlayo, balse Uurka ka buko.

jecelna hantida aad heeysatid adiga in oow isaga kaa dhaxlo.

waxaan hadalkaas ula jeedaa SOOMAALI baan ahay HUBKA

halista ahna Qoomiyadeeyda ma heeysato , xitaa hadii berito

gacanta naloogeliyo, raali kama ihi walaalkeey diinlaawaha ah

ee degan duurka, midkaas aanan wax diin ah heeysanin in lagu

halaago.

Diinteeyda raali kama ahan midaas

xitaa Quraanshada Guryaheeda in Debka lagu gubo ayeyey
Diinteena diiday.

Nabi Suleeymaan cid ka xoogbadneed ISLAAMKA

masoomarin hadana Quraanshada hadalkeeda ma oowsan
xaqirin balse inta ku qoslay ayoow dhahay waan maqlayaa
hadalkaaga.qisadaas meelo badan ayaan kaga hadalnay .

-Qaaruun inta aanan dhulka lala jarin Culimada weey uga digeen
kibirka, waayo waxeey ogaayeen waxa kadhalandoono Hantida
oow kula dagaalamaayo Diinta Nabi Muuse.

shalay markoow Fircoown Ubadkeena leeynaayay isagaas
Qaaruun ah waxba ma oowsan tarin Qoomkiisa, balse marka
baraare lagaaray ayoow bilaabay in Hantidiisa ku dhibaateeyo
Umadiisa.

waa suuragal canug waa danbe dhashay inoow yahay xili Bulshada baraare gaartay lagana baxay

Tiiha,Barakada Eebbe cirka kasoo da`day.

qof Cilmigiisa Umadiisa ugu adeego ayaa badan, Basharka, Binid
aadanka•

mid Hantidiisa wax ku hagaajo ayaa jiro , mid Qalinkiisa
adeegsado mustaqbal quruxbadan, oo ifaayo ifafaalo ka sii
bixiyo ayaa badan.

-mid iska aamuso ayaa jiro markoow naftiisa ubaqay , sidii
Nabi Haaruun.Fircoown agtiisana geesi boow ku ahaay
12 Qabiil fitno dhex timidna waa ka aamusay.

-Culimadaas oow Quraanka sheegaayo kuwii Cimaamadaha
colaad hurinta walfin jiray maahan.

Culimadaas waxeey sii saadaaliyeen waxa ka soosocdo
ficiladaas oow ku kacaayo Qaaruun, isaga kaligiis ayoow Rabi
kaqabtay umadiisa

-hadalka baroorta u badan waan idinku badiyay.ka raali noqda.

=====

#QURAANKA &AKHLAAQ KA HADALKIISA.

Dhoor qodobo ayaan soo texayaa.

-

-BEENTA&AFLAGAADADA& HADALKA XUN, waa in aad ka
fogaataa.

-dhoorsanaanta lagu dhoowsado Xaaskaaga ama Seeeygaada qofka
dumarka ah

gogoldhaafka ayaa la xarimay.sidookale hadal gogoldhaafka u noqon
karo gogol dhigna in lagu mashquulo ayaaba xaaraan ah
(wa laa taqrabul fawaaxisha maa thahara minhaa wa maa badhana)

-dhoorsanaanta ku saabsan dhaqaalaha waa bixinta canshuurta,
ZAKADA.

-ha qiyaanin Hanti.GAAL ama MUSLIM midka doono ha lahaado. -ha u
hanqaltaagin hantida dadka kale.

-BEEGASHADA & MIIZAANKA yaanan leesku qiyaanin baa layiri
waxaa lamid ah qodobada HESHIISKA in leesku qiyaano siiba Qoomka
aqoon ahaan aanan weli halkii wax lagu kala garan lahaay soogaarin
Qoomkaas waa in loola dhaqmaa sida SAFIHA Aayada Quraanka ugu
dheer eey ka dardarantay
(fal yumlil waliyuhu bilcadli)

-wax bixinta hanti beel in eey kugu rido ma ahan
bakheeyl nimada xadka dhaaftayne looma baahna
dhexdhexaad ayaa ladoonayaa , kuleel daran ha noqonin qaboow sida
barafkana ha ahaanin
faldiir ahaaw ama qandac.
-marqaati beenaalaha waa mamnuuc.Rabi ayaa Quraanka ku xarimay.

-meel xan lagu haayo , xaasidnimo lagu shiilaayo, inta xun meelaha lagu haayo hadii eey kusoo dhex dhacaan

Dadka wanwanaasan, xasil ayeey kasiibtaan aayar beey uga dhex baxaan. marka aanan hadalkaaga lamaqleeynin xumaantana kula deristahay ayaa sidaas loola dhaqmaa Dadka.

DILKA oo LAXARIMAY.

Hadilina nafta ayoow yiri Eebbe.

asal ahaan inta aanan la uumin Nabi AADAN waatii laga dooday dhaqan xumada Dadka, Dhiig ayeey daadinayaan.

xitaa hadii oowsan SHEEYDAAN jirin waa sidaas oo dhaqankiisa ayaa ah SHARTA oo la jeclaado

Ubax midkaad udhiibtid Qodax ayoow ka dhex baarayaa

Midkaa tiraahdid Mooskaan cun Lafo Malaay ayoow ka dhex baarayaa .

asal ahaan DILKA ayoow ahaay waxa Malaa`igta ka baqayeen dhiigeena in aan baneeyano.

GAALKA waxoow duulaan ku yahay GAAL kale.

Muslimka isagana waxoow soodil is leeyahay Muslim kale

SHEEYDAAN kaligiis ma ahan waxa sharta afuufayo balse sharjeclaanta dadka ayeey ku dhex daaban tahay .

Sheeydaan hadii eey war ka maqlayaan GAALKA maba dileen

GAALKA kale

Malag hadii eey war ka maqlayaan Muslimka maba dileen

MUSLIMKA kale.

aqristoow soow sax maahan sidaas mise waxbaan qalday?.

(laa tufsiduu fil ardi , qaaluu inamaa naxnu muslixuun)

DILKA & Dhiig baneysiga fasahaad ka weeyn ayaanan jirin

-DUCO ayaa Quraanka na amrayaa in Qoom walba loo duceeyo.

-DUCADA Ubadka loo duceeyo sidoo kale Xaaska.

Sheeqii SUUFIGA AHAAY , MACALIN-NUUR.

SIYAARADA Macalin Biimaaloow marka lasoo gebagebeeyo waa
duceey jiray

waana dardaarmi jiray isagoo dhahaayo

UBADKA haloo duceeyo yaanan la habaarin.

(hab lanaa min azwaajinaa wa thuriyaatinaa qurata acyun)

Qabiil Soomaaliyeed oo siyaasigooda wax qaldaayo in la haabo ayaa
naga mamnuuc ah

qof qalad kaa galay in aad habaartidna ANSHAXA SUUBAN maba
ahan.

-Baarri u ahaada waalidkiina.

-hadii wax laguugu aamino xog ama hanti waa in aad sideeda u xafidaa .

-balan hadii lagula galo waa in aadan ka bixin balanka,

(oowfuu bil cuquudi)

balan Umadeed ayaa loo codeeyn karaa Bulshada wada ansixin kartaa
qodobkaas haduu yahay mid KHEERKA haba yaraadee oow ka dhex
muuqdo sida ADOONSIGA

waa ka mamnuuc DALKEENA dhulka aan xakuno Qof Bini aadan ah
laguma dhex adoonsan karo.

qodobkaas ayaa Dalka dadka iskaleh ku heshiin karaan kuna dhaqmi
karaan .

sooyaalkii xanuunka badnaay ee

ADOONSIGA AFRIKA soo martay darteed ayaana Qodobkaas
Bulshada DASTUUR looga dhigayaa.

Nabiga waxoowyiri ,Gaaladaan Qureeysheed hadii eey qodob iila
yimaadaan oo kheeryka aan isku kaashano ah

waan u saxiixi lahaay .

ADOONSIGA oo ADUUNKA laga zuuliyay nimco Eebbe waaye
SHIINAH , RUUSHKA, REER GALBEEDKA

AFRIKA Umadahaas dhamaan ayaana ku wada heshiis ah danteenaas
INSAANIYADA ka wada dhexeeyso

darteed ayaana utaageernay.Qaramada midoobay ayaa ku heshiis ah
qodobkaas , waa inaan dhahnaa Quraanka ayaaba taageerayo waana
anshaxa suuban, dabar gooynta ADOONSIGA.

NABIGA markoow dhashay Bilaal ayoow xoreeyay , waaba Diinta
halka eey ka bilaabato xoreeynta ADOOMAHA.

inta oowsn dhimanin waxa oow ka dardaarmay waxeey eheeyd xoreeya
ADOOMAHA

Dumarkana ixsaan ufala.

BILOOWGA ilaa dhamaadka hala xoreeyo ayoow dhahaayay
Nabigeena.

Islaamka ADOONSI

uma imaanin balse waa yimid ADUUNKA oo leeyso adoonsanaayo.
maxaabiis is dhaafsigaa ayaa lamid ah.

maxbuuska ADOON waxba ma dhaamo, Adoonka ayaaba dhaamay oo
Ubad dhali karaayay , midkaan

God madoow inta lagu oowday ayeey udiideen in oow Ilmo dhalo ,
marka laga reebo midka SIYAASADA uxiran .

-MASAAFADA&Baari nimada.

-Baarri u ahaada waalidkiina.

hadane meher xadka ayaan taageerayaa oo mad-hab ka dhigtay.

sheekhoow adiga ayaa is khilaafay ma is tiri?.

-midaas aan jawaab kaasiyo.

-qodobkaan MEHR XADKA. kusaabsan waa mushkilad ubaahan in xal
waaro laga gaaro

DALKA MASAR waxaa wada degan MASIIXI iyo Muslim

haba lagu kala badnaado , waxeey dhaqan kadhigteen

wiil Masiixi ah haduu la baxsado gabar MUSLIM ah
hantidiisa waa lala wareegayaa , nabad ugu dhex mushaaxi maayo
magaalada dhexdeeda.

sidaas si lamid ah Wiil Muslim ah hadii oow la baxsado gabar
Masiixiyad ah
isagana hantidiisa Doowlada ayaa la wareegeeyso si nabad ahna dalka
ugu dhex mushaaxi mahayo.

intaas oo QAWAANIIN ah waxa loo sameeyay waa in lagu kala
badbaado. DANTA QARANKA leeyahay iyo midka
QOOYS muslim ah leeyahay ama Qoows Masiixi ah dartiis aanan
Dalka qalalaase loo gelinin
isku dhac Diinta ku saabsan si looga badbaado ayaana sidaas loo
sameeyay.

qofka Muslimka ah sida oow uga gubanaayo
in inantiisa ama gabadhiisa oow la baxsado wiil gaal ah ayeey
MASIIXIYIINTA Masaarida ahna uga
gubanaayaan in Wiil Muslim ah oow la dhuunto gabadhooda.
hadii dadka magaalada ku raagay wax xasaasiyad ah kaba qabin
arinkaas siiba Masiixiga oowsan dhib u arkin in gabadhiisa wiil Muslim
ah guursado
waxa loogu diiday ayaa ah FIDNO in eey kasoo fuucdo halkaas.
CADAW GUUD sida aan wadajir iskaga difaaci laheeyn miyaan ku
mashquulnaa mise laba qooyis inamadooda?.

kANIISADA & AZHAR

weey ka arinsadeen kadibna qodobadaas ayeeyna kaga heshiiyeen sidaas ayaana loogu dhaqmaan .

TIGREE&AMXAARKA, & ERETERIYA dhamaan in eey qodobkaas ku dhaqmaan ayaan u maleeynayaa.

xuuraansi ayaan ku maqlay in ITOOBIYA ka mamnuuc tahay Ardayga iyo Ardayada kala diinta ah

in eey is damcaan hadhoowna isku dhac diimeed halkaas kaba dhasho.

-AAN USOO LAABTO QODOBKAAN , KUSAABSAN

QUDBASIRO AMA MEHER XADKA.

SALAFI ama WAHAABI, waa isaga qofka diidan in meherxad lagu dhaqmo siiba gabadha oow dhalay in la meher xatho .

qiso 10 sano kahor aan ka qoray arinkaas qeeybta sare ayaan ku qoray ka aqriso..

SUUFI& SALAFI Dalkaan ayaa ka dhexeeyo Soomaali ayaa la wada yahay

DASTUURKA halagu daro qodobkaas MEHER XADKA waa ka mamnuuc DALKEENA

qudbasiro ayaa lamid ah , MASAAFO gabar lala dhuunto qofkii ku dhaqaaqo

DALKA gudahiisa nabad kuma joogaayo hala dhaho.

AABAHA inantiisa udiidan ineey guursato Wiilka eey jeclaatay
BOOLISKA XAMAR, HARGEEYSA, JABUUTI xarumahaas ha usoo
dacwooto

mudo isbuuc kusiman hawoow ka jawaabi waayo Aabaha dhalay
gabadhaas, DOOWLADA ayaa xaq uleh in eey ku mehriso
ninka eey dooratay Diin ahaane xalaal u ah .

Soomaali baa nahay qodobkaasna weey ku heshiin karaan REER
AALA-SACUUD & SUUFIYADA./ASHAACIRO.

#DAMACA GUMEEYSI oo la dedaayo haduu jiro.

Inaga Soomaali hadaanahay DAHABKA SACUUDIGA kasoo butaacay
qofna wax lagama siiyo

DAHABKA BUURAHAA OROMIYA dul ceegaago xoog ku doono
cidna uma fatwoonin aniga

Umad walba halkoow Eebbe ku beeray ha iimaansato

DOOWLADA IMAARAADKA hadii aan gacan hoorsado, manag alaay
hal maalin u tuugsi tago

<Nabi Ibraahimba Ubadkiisa ayooow arzaaqad uga doontay Qoom gaalo ah>

waxoow awoodo

ha iigu soo rido gacantaas baahan , balse BERBERA ,BOOSAASO,

BANAADIR beec maahan dhulkaas

GACAN GUMEEYSI ayaa waa hore lagu gooyay halkaas.

Waddnaheena waxoow jecelyahay Bulshada IMAARAADKA dhex
degan

jaceeylkaasne RABI AYAAN JANO uga rabnaa.

Diinta waxeey tiri AGOONKA xoolahiisa hala dhoowro.

Ariga meel daaqaayo ha qunsanin hadoow Quraanka kugu yiri sidaas.

Ariga waan iska daayay balse GEELA ayaan Mooradiisa gelayaa

ee INDHAHA QABSO= Aayadaha Eebbe oo qalad loo fahmay ayaan u
arkaa aniga.

(walaa taqrabul maalal yatiima ilaa bilatii hiya axsan xataa yabluga
ashudahu)

=====

=====

(Cibaadun lanaa ulii ba`sin shadiidin)

Rabi waxoow yiri ADOOMAHEENA

waxaa ka muuqato halkaas qoomkaas in eey ahaayeen qoom

Muslim ah

waayo qolo gaalo ah , Rabi ma dhihi leheeyn

ADOOMAHEENA

siiba xiliga lajoogo goob dagaal.

FIRCOOWN markoow ka hadlaayo Rabi ma oowsan dhihin waa
ADOONKEENA weliba isagoo ka jeclaanaayo Reer Banii-
israa-iil, marka waxaa iska cad qoladaas in eey ahaayeen qoom
Muslim ah .

MUCTAZILO weey ku baraarugeen arinkaas.

=====

#Geedi socodka loogu jiro hirgelinta Doowlad weeyn oo
Masiixiyada mideeyso , mid weeyn oo Muslimiinta mideeyso,
mid weeyn oo Yahuuda mideeyso.

--

-waxa suuqa yaalo kuna saabsan Aakhir-zamanka
ayaan idinla wadaagayaa waana wax Dadka qaar ku
sheekeeystaan .

waxba yaanan laga xajiimoonin hadalkaan hoos ku qoran.

#Diinta oo Qoomiyad laga dhigay .

Wiil Yahuud ah haduu soo Islaami lahaay waxoow isleeyahay
Khilaafadii lagu balan qaaday miyaad ka tanaazulee

waa in aad raadisaa, Masiixiyada adiga ayeey ku magacdhabeen
,adiga ayeey magacaada

sheegeen in eey kuu soo laaban doonto Doowladii weeyneed ee Yahuuda.

-Wiilka Qureeysh isagana xisaabo ayoow isku dhufsaday dhoowr xadiis ayoow kilkilaha ku sitaa waxoow dhahayaa Khilaafadii Rabi ii balanqaaday waa in aan soo helaa.

Umadaan soo Islaamtay Induniisiya ilaa laga gaaro Marooko, Eeraantana haka reebin waxaas dhamaantood ayoow rabaa in oow madax unoqdo hal meelna ka xakumo.

waa la iibalan qaaday ayoow dhahayaa .

Quraankii Nabiga loosoo dhiibay hadii eey Umadaha ka qaateen kuma qanacsana weli aniga Doowladeeydii iga dhuntay waa inaan soo helaa ayoow dhahayaa .

-Qureeysh waxaa ka dhalandoono MAHDI Nabi Ciise xitaa isaga ayaa salaada dujin doono.waxa halkaas ku qarsoon ayaa ah Nabi Ciise hadoow dib u soo laabto xiyaa in aanan IMAAM nimo loo cizeeyn doonin balse Mahdiga loo hogaansamo waana nin Qureeysh ah .

markoow Nabiga dhintay ilaa maanta inta kadhaxleh Mahdi baa dhashay ama mid dhahaayo anigaaba ah Mahdiga imisaa la arkay sooyaalka Buugaagta naloogu daabacay.

{xog aanan weli ii dhameeystirmin ayaa jirto, baaris ayaana iigu laaban, waana moowduuc ku
saabsan Nabi Muxamad inta oowsan imaanin kahor Rag waxaa jiray sheegto Nabi nimo weliba
tilmaamihii Nabi Muxamad lagu sheegay ee Kutubada ku dhignaay inta la aqristay isagii baanahay
Rag yiri in eey jireen ayaan baaris ku wathaa/wadaa}.

Adoonsiga oo aduunka kasuulay ayaan aragnaa
sheekadaasne iskama imaanin ragbaa dhiigooda u qubay ragna
qadaf ayaa loogu geestay

SAYID QUDUB ayaa kamid ahaay raga yiri Dastuurka waxaa
lagu qori karaa ADOONSIGA waa ka mamnuuc Dalkeena
Doowlada reer Aala-sacuud Culimadooda qaar kamid ah intaas
ayeey ka xajiimoodeen kuna canaanteen, wadaadkaas.

SAYID QUDUB Tafsiirkiisa qof la xiiqsan maba ihi waayo
ninkaas godka KHAWAARIJTA ku dheceen ayoow isagana ku
dhacay.waa ninkii yiri

Umada waa gaaloowday.Sheekheena Yuusuf Alqaradaawi
iyo Culimo kale ayaa ka jawaabeen arinkaas.

-qoladaan Axaadiisleeyda ah waxeey ku doodayaan waa jiri
doonaa ADOONSIGA inta laga rogaayo Aduunka.

waxaan ugu jawaabeeynaa kuwaas cida Adoonsi lagu
dhibaateeyay waa Bulshada madoowga ah.

Rabi Quraanka waxoow kaga waramay qoom baraare intee
gaareen iyagii hadana dhibsaday barwaaqadaas
waxeey ku duceesteen Rabiyoow barwaaqada weey naga
badatay balaayo noosoodeji, dadka faqiirka iyo taajir ha u kala
baxeene si loo kala garto

Qoomkii SABA ayeey ahaayeen kuwaas hadii aanan qaldaneeyn
waxaa doqonimo ah in Adoonsi lasoo celiyo dadka qaarkii u
ooyaan

nicmada lagaaray lagu kufriyo , Dadka hadii eey garteen inyar
oo wanaag ah, waxaa waajib ah in horay loosii dhaqaajiyo balse
ma ahan in dib loogu celiyaa jaahilnimada.

Adoonsiga dhiman in laga xoroobo waa midkaan watharta wadarta
dadka loo gu, gu-meeksanaayo dhaqaale ahaan.

=====

#TAFSIIRKA.SUURADA AL-ISRAA.

Ibnu kasiir waxba sooma kordhinin marka laga hadlaayo
Suuradaas waxoow kasoo minguuriyay Tafsiirka DHABARI.

dheelminta Nabi la dheelmiyay ayoow ku daalay ka hadalkeeda
ileeyn waa wax oow aad u xiiseey-

naayay isaga.

marka aad meel ku soo daashid, hoowl ma qaban kartid in aad
nasatid ayaad u baahan tahay

xooga maba saarin oo si fiican uma bayaanin baabkaan aan
aniga ka hadli rabo.waa iska dulmaray uun

-Tafsiirka la qoray xiliyadaan danbe iyagane waxeey ku sirireen
siyaasada.

riri= marka Tubaako aad cuntid ama Sigaar dhulka ayaa kula wareego, waad sirirtaa.sidookale marka aad kortid wiifoowga aadka u wareegsanaayo , waxaad moodaa

in dhulka kula wareegsanaayo iyadana waa lagu macneeyn karaa)

Rabi ereybixinta

(Cibaadii)

yoow u adeegsadaa,

(fa asri bicibaadii leeylan)

(cibaadunaa)

dadkii hore waxeey ku fasireen Doowadii Roomaanka.

waana Doowlad gaalo ah kuna soo duushay
Qudus iyo Suuriya, qabsatayna dhulka barakeeysan
xiligaasna waxeey ka horeeysay dhalashadii Nabi ciise.
markoow dhalanaayay iyaga ayaa Qudus
xakumaayay.

Doowladii FURUS & Roomaanka
dhamaantood gaalo ayeey ahaayeen aanan Rabi rumeeysneeyn.
Qoomkaas gaalada ah Rabi kuma tilmaami karo CIBAADII.
Rabi markoow ka hadlaayo ASXAABAL UKHDUUD
bal ufiirso qaabka oow uga hadlaayay
cida la ciqaabaayay waa Qoom Muslimiin ah.

TATAARKA miyoow CIBAADII dhihi lahaay Eebbe
hadii oowba ka hadli lahaay arimahaas. jawaabta waa maya.
-Tafsiirada cusub ee waayadaan danbe la qoray qaarbaa ku
macneeyay YAAJUUI.

iyagaasna waa qoom gaalo ah sida eey sheegeen dadka
aaminsan jiritaanka Qoomkaas.
qilaaf xoogan ayaa ka jiro YAA-JUUI marka laga hadlaayo
,hadii eeyba jiraan waa qoom gaalo ah.

=

Bulshada Yahuuda ah waxaa loo sii sheegay laba jeer ayaad dhulka fasahaadin dontiin, layaab maleh in loosii sheego arinkaas waa sida Nabi Aadan inta aanan laba uumin loo sii ogaay halaaga eey Ubadkiisa dhigi doonaan. waa halka lagu habaabo meelahaas hana leeska ilaaliyo arimahaas yaanan lagu taraxtegin QADARI waa halkoow ku dhumay.

Sheeydaanka isaga oo aanan weli gaal noqonin sidee ayeey Malaa`igta uga warqabeen.

Dadka hadii la uumo in eey Dhiiga daadinayaan.

Fasahaada 1-AAD.

-Nabi Muuse hada kahor waatii la dhahay soodoono Kutubka Toowreed , markuu aadayne waatii eey Dibiga caabudeen Fasahaada la sheegaayo mida koowaad waa midaas .

(wa laqad fatanaa min bacdika)

halkaas ayeey nooga muuqataa fasahaadka la sheegaayo in eey tahay midaas waa hadii aan Quraanka kuba fasirno Quraanka.

-marka kale waa xiligii la bilaabay in ladilo Nabiyada .

(wa yaqtuluuna nabiyiin bigeeri xaqin)

TAFSIIRKA ZAMAKHSHARI⁽¹⁾

fasahaadka labada jeer waxoow ku fasiray , dilka Nabi Zakariye
fasahaadka labaadna waxoow ku fasiray dilka Nabi Yaxye.
cida soo weerartay waxoow ku fasiray ROOMANKA iyo
FURUS/Eeraa.

waxoow qoray wadaadkaas. Rabi waa iskaga dhexbaxay waayo
shacabka Yahuuda waxeey noqdeen qoom faasiqiin ah laba qolo
oo watha fasahaadsan oo halkaas ku dagaalaayo ayeey ahaayeen
sidaas ayoow ahaay nuxurka hadalkiisa.

-waxaa is weeydiin leh XABASHIDA marka godadka inta loo
qoday Debka inta la ololliyay lagu guraayay kuwaas FAASIQIIN
miyeey ahaayeen

hadii kuwaan oow ku macneeyo in eey ahaayeen umad jidkii ka
dhunsan

(wamaa naqamuu minhum ilaa an yu minuu)

waxaa meeshaas ku cad in eey ahaayeen Umad Muslim ah
xaqdaro loo leeynaayay.

-Bulshadeena Xamar

(2018 ZOOBE)

qaraxyo laga soobuuxiyo Baabuur

Baziinka Hooyada ag fadhiday ee Looska halkaas ku iibineysay
Laamiga banaankiisa.

Kabo caseeyaha waxoow cuno heeysanin .

midka Cathayga Laamiga la taagan cid baahan kasoo tegay
saakay waxoow kula laabto usoo doontay Suuqaas.

halkaasna lagu xasuuqay.

ASXAABAL UKHDUUD Dhuxulaha loo ololiyay lagu
shubaayay waxba isma dhaamaan ZOUBE iyo iyagaas, waa laba
sawir oo eey leeyihiin Muslimiin la dhibaateeyay -Warbaahinta
Al-jaziira Weriye ayaa joogo halkaas warkiisana waxyi maahan.
hadii maanta Doowladeena laga adkaado kuwa duurka ku jiro
sida Jiirka ugu soo qamaamaan Dalkeena waxeey dhihi
doonaan calooshood u shaqeestayaal OROMO ah iyo
JABUUTIYAAN iyo YUGAANDHEES ayaa meesha looga
adkaaday Muslimiinta ayaana guuleeysatay.

Geesiyaasha XOOGA DALKA Soomaaliyeed
maxeey ka taqaanaa Hahar Calmaaniyad ah iyo Wiil Cabsan
Qoomiyada Carabb-nimada ha sareeyso ku dhisan.

HOOYADA shalay lagu halaagaayay AFGAANISTAAN,
Ajnabi ayaa Dalkeena kusoo duulay

iyadoo mar-marsiiyo laga dhiganaayay Qaraxyo lagu leeynaayay doraad.

maanta AFGAANISTAAN Ajnabi miyaa joogo halkaas idinka bal iisheega?.

kalsooni inta lamuujiyo AFTI maa laga qaado Umada is kaleh Dalkaas.

Aaya-tulaahi waa kaas Umadiisa xoreeyay AFTI ayaa lagu maamulaa Umada Eeraan.

Wadaadka Masaajidka Furahiisa hadii lagu wareejiyo ayoowba muran ka keenaa, Madaxtooyo xil wareejiinteeda aadbeey u macaantahay.

beryahaan Imaam nimada Masaajidka waxaa la bilaabay in loo tartamo waxa sidaas loo yeelay ayaa ah in Wadaadka lasoo tababaro, hadii laga guuleesto si oowsan muran uga keenin doorashada.

Askariga darajadiisa ayaa hoos loodhigayaa, midna waa la dalacsiiyaa. shalay qofka oow theejin/ adeejin jiray ayaa maanta isaga amarka siinaayo.

mid Timo jilcan hadii oow ahaay taliyaha, maanta waa mid Timo adag oo Jareer ah , berina waa Banaadiri kor cad.

-Bulshada SUURIYA SUN ayaa lagu laayay
xaq ayeeyna u leeyihiin in AFTI xalaal ah laga qaado si eey ugu
soo doortaan XILKA madaxweeyne nimo.

anigaa xoreestay markeey noqoto berito adigana midkale ayaa
kaa xoreeysan doono.

waana Jidkii Mucaawiye inoo jeexay markii meel lagu xooray
SHUURADII Nabiga SHAREECO inooga dhigay.

"Gabay:*Baadida ninbaa kula deydeyayo daalna kaa badane*
=Boqorrada Carbeed & Dimoqoraadiyada "

TV-GA aan magaciisa xusay, naceeyb aan uqabo umasoo
hadalqaadin Dhiigooda ayeey u hureen Umada in eey xaq usoo
tebiyaan, balse qoom walba AKHLAAQDA looma wada
dhameestirin.

wax iyaga dhaamo oo waayadaan ladaawado ayaanan jirin.

QOOMIYADDA, DURUUZ ee degan Dalkeena aadka u
balaaran, Qalinkooda ayeey Soomaalida aqrisan-jireen
sanadka 1900-1950-kii.

Amiir Shakiib ayaa ka dhashay oo SUNI ah Xaaskiisana waa
iyaga.

Al-jaziira sanadka 1936 waxaa loo yaqiinay joornaal kasoo bixi jiray Dalka Suuriya, magaalada Dimishiq.

weriyihii iskalahaa joornaalkaas waxoow soo booqday

JABUUTI, ASMARA, ADIS ABABA, HARAR, DIRIDHABA.

sanadkana waxoow ahaay 1936 Buug ayoowna ka qoray safarka oow ku tegay dhulkaas .

weriyahaas magaciisa & Buugiisaba aan sheego

waa

Muxamad TEEYSIIR ,Thabiyaani al kiilaani.

-Buuga oow qorayna waa

(Mushaahadatii fii bilaad al islaam al xabasha al muslima)

=====

(1) Ninka qoray Tafsiirkaas waa Muctazilo ku waasna mad-habtooda ayaa ku dhisan qofka wax dilo waaba gaaloobay ha ku kadsomin hadalkiisa.Khawaarij ayaa dhashay iyaga markii Qorayga looga adkaaday ayeey bilaabeen in Qalinka adeegsadaan Muslimiintana gaaleeysiiyaan ,sida hadeer Reer AALA-SACUUD inbadan oo kamid ah u dhahaan Umada waa gaaloowday kadibna dhiigooda hala baneeysto.

Kutubka Tafsiirka inta aadan aqrisanin marka hore ku baraarug Ninka qoray mad-habtiisa iska baar.SAYID QUDUB allaha u naxariisto balse iska jir waa Takfiir.

-Suuqyada Soomaalida 2 Kutub ayaa lagu iibiyaa oo Tafsiir ah

mid waxaa wada qoray culimo badan oo u badan Reer Aalasacuud , Sacuudiga ayaana maalgeliyay beryahaan danbe waxeey dhahaan hal wadaad ayaa qoray Tafsiirkaas. mar dhexdaas ah ayoowna dhintay Allaha u naxariisto Sheekhaas, balse hoowshaas kaligiis ma qabanin Culimo badan ayeey ku wada qabteen.

si fiican u aqri LAHJADDO kala kaan ah ayeey ku qoreen halkaas waayo waa Culimo kala lahjado ah , Buuga oow hal qof Qalinka u qaato waxaad ku garataa hal lahjad ayoow adeegsadaa.cida qortay Kitaabkaas qeer Allaha siiyo balse AL- AZHAR inta lageeyay Kutubkaas Culimadii

ASHAACIRADA Afti loogama qaadin

qaabka aan wax u qornay sidee u aragtiin lama dhihin. Cumar faaruuq ASHCARI maahan

AHLA SUNA, Reer Aala-SACUUD kaligood laguma tilmaami karo.10 sano kahor ayaan

baraarujiyay arinkaas.

-Tafsiirka 2-AAD

waxaa qoray Xasan Yacquub Sacuudiga ayoowna degan yahay Lahjad ahaan dhalinyarada isaga

ayaan dhihi lahaay aqrista waayo Qalinkiisa waa Qalinkii Abwaanada.

-maxaa Suuqa ka maqan ?.

TAFSIIR eey qoreen ASHAACIRO midkaas ayaa ka maqan Suuqa Soomaalida .

(mp3)

ama dhageeysi boga

ww.NUURALIIMAAN.Com

ww.sheekhmaaln.com

ayaad ka dhageeysan kartaa culimada ASHAACIRADA balse markeey noqoto QORAAL

(0)

waaye dhankooda.

#CALMAANIYIINTA & NABI CIISE.

Qiil waa loo heli karaa warkooda.

NABI CIISE sooma socdo ayeey dheheen iyaga.

-In Nabigeena la dheelmiyay arinkaas

waa leesku qilaafay Ruuxda ayaa la dheelmiyay.

mayee jirka iyo ruuxda oo wada socdo

beey ahaayeen intaasba waa la yiri qaarna waxeeyba dheheen

Qudus iyo Kacbada mabadhaafin cirka

maba looqaadin.

-Nabi Ciise sida Nabigeena ayaa la yeelay oo kor inta

looqaaday ayaaba lagu aasay Xidigaha sare

dhexdooda.Maarsa ama Dayaxa.

(bal rafacahulaahu ileeyhi)

(falamaa tawafeeytanii kunta anta raqiibu)

Nabi Ciise waxoow dhahayaa markaad isoo oofsatay.

(Qul yatawafaakum malakul moowti aladii wukila)

Rabigeena si toos ah umaba dhihin

Nabi Ciise ayaa Dhulka ku soo laaban doono, Quraanka kuma qorna xogtaas balse SUNADA ayaa warkaas laga helay Xadiiskana sixitaan kiisa dad qaas ah ayaa u qaabilsan balse Quraanka sixid umaba baahna.

Nabi Ciise imaanshahiisa wax ku xiran ayaanan jirin, shalay isagoo ka maqan Aduunka Hooyadiisna foolanin hoowsha weey kala socotay Quraanka qaabab badan oo loo aqriyo ayaa jiro 7 qaab ayaa lasheegaa

(wa inahu lacalamun li saacati)

Aayadaas qaabkaasna waa loo aqriyaa hadii sidaas loo aqriyo waxeey noqtaa

"Nabi ciise waxoow calaamad u yahay Aakhir zamanka"

Dhalashadiisa miyaa loola jeedaa sida Nabi Muxamad oow u yahay calaamad muujineeyso in Aduunya gadoonka soo dhawaaday.

mise waxaa loola jeedaa Nabi Ciise marka oow dhulka kusoo laabto .

Culimadii hore waxeey dheheen imaan shahiisa danbe ayaa loola jeedaa.

balse wax diidan ayaanan jirin fasirka kale.

xiligii Qudus la qaribay

(oow kaladii mara calaa qaryatin)

Aayadaas waxeey ka hadleeysaa xiligii Qudus la qaribay
Ninkaas socotada ahaay isagana waa ogaay in la camiri doono
magaaladaas sidaas ayoow ula yaabay waana la tusay iyadoo
camiran.

Yahuuda 2 jeer eey aduunka fasahaadiyeen waana Islaamka ka
hor, Nabi Muxamad intoowsan imaanin ka hor wax ahaay
ayoow ka hadlay Quraanka.

--

SHEEQ SHACARAAWI ayaa si wanaagsan uga dooday
Aayadaas Fasiirkeeda balse isagana waaqica ayaa ka tanbadiyay
Gumeystaha ayoow Aayada dul dhigay oo taariikhdoodii hore
xooga masaarin.

= wax yar oo musiibo ah hadii eey meel ka dhacaan
aduunka ayaa larogi rabaa in la dhaho waa laga roonyahay.

Nabiga isagoo hal magaalo ku go`doonsan ayoow dhihi jiray
wax iska dhiciya magaaladiina ka difaacda cadawga Rabigiina
caabuda. cibaadeesta guul wacan.

= Nabiga Wiil kiisa ayaa dhintay.

Dayaxana waa madoobaaday waxeey dheheen Wiilka Nabiga
dhimashadiisa ayeey musiibadaas u dhacday.

beryahaan danbe Xasan & Xuseeyn ayeey u bedeleen.

dhimashadii Imaam Cali iyadana waxeey noqotay cuqdad
cadawga ka faa`iideesto.

Xamze waa la dilay Nabigoo nool ayaana la dilay

Cali Bin abii dhaalib kama fadli badna Xamze.

Dalka dartiis hadii loo dilay isaga.

Dalka iyo Diinta waa loo dhiman jiray weligood.

Madax weeynihii heeb ahaanta MAJEERTEENKA ahaay

DIMOQORAADIYADA Xalaasha ah isagoo ku hoowlan

hirgelinteeda ayaa waxaa dishay gacan ka gardaran

waana FAL Sheeydaan.

1 qof ayaana geestay.

qolo nabarada sii qod-qodo hadaad aragtid qarash ayeey ku qaataan ama qalbiga ayeey ka jiran yihiin, Qabyaalada ayeeyaan iska daahirinin.

Doorashada markeey tahay Aadan baa ku deyashada dadka wada amaaneen, dariiqeena waakaas ,maalintaad idiidaa,aayarbaan ka daadegi ,dacar yaan lakala mudan,dadweeynaha lakala dilin,Diinteena waa meel doorashaa nawada deeqdo.

dhaxal maahan kursigaan ninba maalintiisoow wadaamaha ka dhaanshaa.

= Majeerteen, amaan mudan

Cali Bin abiidhaalib Ragbaa ilaa hadeer waxeey ka dhigtaan wax lagu Oowrkacsado.

Qalalaase ma ogolin qisaas baan ku qanacnaa ayeey dheheen.

FITNO Umada lagu halaago dhankooda kama soo fuucin.

Nalka oow Madaxweeynahaas Umada ushidaa waa kaas kaahiisa baxaayo Doorashaa dadka deeqdo wax aanan eheeyn Majeerteen kamaqli meeysid.

xaafadaada markaad doorasho xalaal ah ku qabatid ayaan ku amaani karaa.

-Culimada ASHAACIRO safka SUUFIYADA

weey usoo halgameen Dalkaan sax iyo qaladna weey ku sifoobeen Doowlad nimada Soomaalida wax maqaam ah kama helin maxaa ugu wacnaay midaas?.

taas waxeey ubaahan tahay baaris xoogan in lagu sameeyo

SUUDAAN, LIIBIYA, SOOMAALIYA

meelo badan oo Dallkeena kamid ah Ragii soo halgamay waxeey noqdeen Jaran-jaro lagu fuulo Buurta ka dibna leeska leexiyo.

Bulshada hadii eey wax dooraneeyso weliba SHUURO xalaal ah, hanka sare ee loo halgamaayay ayeey kamid tahay,

Wadaadka ujeedkiisa waa inoowsan ahaanin

Ilmaha aad adiga dhashay Doowlada ha u shaqeeyo

ama Madaxweeyne ha ka noqdo adigana Boqor ka noqo Dalka, isagana dhaxal suge ha kuu ahaado.

xusuuso Qisadii Nabi Daa-uud aan ka qornay.

#ISBEDELKA CIMILADA& FATAHAADA WEBIYADA!.

(qormadaan isbdelka cimilada waa qormo hore, aan u faafiyay balse ku haboon in halkaan dib loogu qoro si xogta aan halkaan ku qoraayo u noqoto mid is dhameestirto, waxna waan ku kordhiyay)

Aaduunka intoowsan Nabi Aadan imaanin

Rabigeen Webiyaal ayoow dhulka kadilaaciyay

si biyaha halkaas ugu qulqulaan.

balse Doowlada qaar inta eey Biyaxireeno dhistaan

dhulgariir hadoow dhaco Biyaha nagu soo butaaciyaan gar maahan sidaas.

Dalkeena SUUDAAN magaalada WAAD-MADANI

weey udhamaatay oo biyaha ayaa qaadayo.

shalay ayaan TV-yada ka daawaneeynay waxa ka dhacayay
LIIBIYA

magaalo dhan oo 10-kun oo qof degan tahay in daadka qaaday
marka biyaxireenkii karkaarka jabsaday.

-Beesheena Oromada ah Beer falasho uma diidani barwaaqo in
Dalkeena gaaro kama soohorjeedo.

-SUUDAANTA markooda hore ayeeyba meel qaldan caasimada
ka dhiseen.

kama guuri karno oo qarashbaa naga galay

balse Bulshadeeyda SUUDAAN waxaan uga baqayaa sida
LIIBIYA in eey iyagana ku dhacdo .

- Nabi Muuse waa layaabay dhaqanka Ninkii cilmiga badnaay markoow yiri Doonta ayaan musmaar ku duleelinayaa.

Doontaasna waxaa iskalahaay dad cawaan ah Nabi Muuse waa kadiiday balse isagana qorshe kale ayoow ka lahaay oo ah sida loo bad-baadin lahaay Doonta lafaheeda , labadoodaba qiyaano la qiyaano diinlaawayaasha uma eeysan qarsaneeyn.

Qoomiyad tacasubkeeda dad eey madax martay ma eeysan eheeyn labadaas Nabi.

- 2004 Xeebaha Soomaalida maxaa kadhacay maka warqabtaa ?.

mise waaba halmaantay ,Magaalooyin camirnaay Xeebaha quruxda badan.Sunaami ayeey ku halaagsameen.XAAFUUN,BANDAR,BEEYLA.

XAAFUUN qofka aanan aqoonin 1200 sano kahor Buuga laqoray loogana waramaayay sooyaalka Soomaalida soo aqriso dhaha.

MASCUUDI baa qoray waana dhulmareenkii Carbeed .

MAJEERTEEN ayoow halkaas kusoo arkay,

Odayaashii Gumeestaha soo ababiyeen Majeerteenkooda

waa mid mardhow Doon ku yimid Dalkeena

-Diiwaanka duuga ah kii daalacdaan ahay , mid galbeedka daabacay kuuma soo daliiliyo .

-waliinjadii gumeestahay wax kujiray masoo eegin ,wiil-oww barbaarshayna weligeey wax kama meersan.

- aniga aqoonta Webi qodista maba lihi. balse aqristoow isweeydii Rabigeen Biyaha waxoow ugu talagalay in eey Webiyada ku qulqulaan hadii laga duwo dhankaas , loona duwo dhanka Bada sida webi GANAANE/ Juba lagawada dhigo maxaa dhacayo?.

Aduunkoo ithil ^{idil} dhaqankaas wada yeesho, maxaa dhacayo?.

Biyaha Bada weey sii badanaayaan , kabacdi waxaa suuragal ah in Aadanaha dhamaantiis sida qoomkii Nabi Nuux dib loogu celiyo, dhamaantood la halaago.

lagayaabee in laguugu laab qaboojiyo Xadiis Nabiga sheegay oo ah Qoomkeeyga ,Biyo laguma halaagi doono.

Dalka Liibiya magaalo dhan ayaa Biyo lagu halaagay Bini aadan ayaana ka danbeeyay,2023.

Umada Nabigeena kamid maahan miyaa kuwaas?. Shuhado waaye shacabkaas, balse cidbaa halaagaas ka danbeeysay

(xusuuso,gabaygii ,HALAAGII DHACAY LOOMA KALA HARIN)

-Umada Nabi Muxamad lama halaagaayo qalad baa laga fahmay.qoom ayaa Kacbada sooweerari doono

dhulka ayaana lala jaridoonaa ,sida Qaaruun loo halaagay ayeyy noqondoonaan.

isweeydii kuwaas Umada Nabi Muxamad kamid maahan miyaa?.

-Suurada (Alisraa.69)waxaa ku qoran " miyaad ka aamin noqoteen in dib loosoo celiyo halaagii qoomkii Nabi Nuux mid lamid ah?.

nuxurkaa sidaas ahaay.

-Abwaan Cali mooge geedi in badan ayoow kadeeyriyay Warshadaan qaaca badan, Aduunka iyadaa kululeeysay,Barafkii galbeedka jiif-jiifay iyadaa soo dhalaalisay Badahana kusoo dartay,Abwaanada ilhaam ayeyy ku gabyaan, Nabi Yuusuf Boqorkii ayoow ufasiray riyadiisa abaarta soosocoto looga digaayay, iyadana waa ilhaam Rabi ku ogeeysiiyay shacabkii Masar dhibka kusoo fooleh, maxaa diidaayo in Abwaanada Rabi nooga hadalsiiyay.

-Jiilka dhalandoonoow Aduunka idinkaa iskaleh wadajir haloo ilaashado.

LASOCO QEEYBTA 5-AAD

=====